

Shirkii 15aad ee UMA.

- *Socmaalida iyo Xoolo Dhaqashada.
- Horseednimada Xisbiga iyo Ururrada Bulshaga.
- *Loollanka Dabaqadeed.





waxaa soo saara GOLAHA DHEXE EE XISBIGA H. K. S. BISHIIBA HAL MAR

GUDDIGA QORAALKA

MAXAMED AADEN SHEEKH / Guddoomiye

ABUUKAR MAXAMED XUSEEN (Ikar)/ Xoghaye

XUBNAHA GUDDIGA QORAALKA

Xuseen Maxamed Aadan Saciid Cabdisalaam Rashiid Shiikh Cabdulaahi Yuusuf Suleymaan

QIIMAHA

Soomaaliya

Koobigiiba 2/= Shilin

Sanadkiiba 40=/ shilin oo kharajka Boostada ku jiro Dumida Carbeed iyo Afrikada Bari 40/= shilin sanadkii oo kharajka boostadu

ku jiro.

Koonfur, bartamaha iyo Galbeed Afrika

\$17.00 sanadkiiba Kharajka boostadu ku ji-

Assiya

\$20.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku jiro

Yurub

\$25.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku jiro

Ameerika (Waqooyi iyo koonfur)

\$30.00 sanadkiiba oo kharajka boostadu ku

TUSMADA


DAYMADA

I.	DAYMADA	Bogga
4,	— Shirkii Ururka Midowga Afrika muxuu dhaliyey?	0
11.	ARRIMAHA SIYAASADDA, DHAQAALAHA, IYO BULSHADA:	4
	— Kaalinta Hoggaamineed ee Xisbiga iyo xiriirka uu la leeyahay Ururrada Bulshada. (Daahir Warsame)	4
III.	NOLOSHA XISBIGA:	6
	 Kal-fadhigii 2aad ee Guddiga Dhexe Ururka Dhalinyarada Kacaanka Soomaaliyeed. Dhammaashaadka Xuska 1da Luuliyo 	8.
VI.	WARBIXINTA BISHA:	4.4
	— Arday Qalin Jebisay — Wareysigii Guddoomiyaha Hoggaanka Aydoloji-	11 12
	yada	13
	— Wargeyska Heegan — Eedayn aan sal lahayn	13
	— Bay oo guddoonsatay Billad	14
	— Goʻaanadii UMA iyo Shirkii Dhexdhexaadka	14 15
	 — Dugsi Cusub ee Farsamo — Agaasimaha Ururka Islaamka oo yimid Soomaali ya. 	16
V.	HIDDAHA IYO DHAQANKA:	
	— Qaayaha xoolaha iyo dareenka qofka Soomaali- ga ah.	17
	(Rashiid Sheekh Cabdullaahi) — Qoraayow ayaad la jirta (Riyaale) — Saadaal masrax cusub	19
	(Maxamed Daahir Afrax)	21
VI.	ARAGTIDA CILMIGA AH:	
	— Loollanka Dabaqadeed waa xoogga wadaha horu- marka Bulshada	24
378	(Maxamuud Cabdi Cali) I. BUUGAAGTA IYO QORAALADA:	
¥ 2.	Khudbaddii Xoghayaha Guud ee XHKS ee 1da Lu- uliyo.	27
	HALGAN Telefoon Lr. 720-51,74 S.B. 1204 Qolka Lr. 112	
00	ku soo baxa afafka Soomaaliga Guriga Ummadda Carabiga iyo Ingiriiska. Muqdisho,JDS	
C	ODKA RASMIGA AH EE GOLAHA DHEXE EE X.H.K.S.	

Bishiiba mar sannadka 2aad Tirsigii 21aad Luuly o 1978,

qiimaha waa 2sh.

DAYMADA



Shirkii Ururka Midowga Afrika Muxuu Dhaliyey?

Dabayaaqadii Gugii hore iyo sannadkan horraantiisiiba waxaa aad looga hadlay amuuraha cul-culus iyo dhibaatooyinka loo caal waayey ee dhawr goodood ee qaaradda Afrika ka taagan, kuwaas oo han-weyn laga qabay in marka Madaxda Afrika ku kulanto shirkooda 15aad ee Khartuum ka dhacayey, bishii Luulyo, loo helo, markay u liidato qaarkood, daawo meel mar ah oo laga bogsiiyo. Ammuurahaas waxaa mudnaanta hore lahaa:

- 1) Xaaladda ka taagan Geeska Afrika.
- 2) Midda ka taagan Koonfurta Afrika.
- 3) Midda ka taagan dalka Jaad.
- 4) Midda saxarada Galbeed.
- 5) Faragelinta dawladaha Shisheeyaha ah ammuuraha Afrika iwm.
- 6) Arrinta Bariga Dhexe waxaad mooddaa iyada in xal raadinteeda, guud ahaan, Afrika uga tanaasushay Dawladaha waaweyn iyo kuwa ay gaar ahaan u khusayso.

Hagaag, Afrika way shirtay arrihamaas oo dhanna waa la soo hordhigay. Shirkii Wasiirrada oo kan sare ee Madaxweynayaasha dhawr beri ka horreeyey, markii aad loogu falanqeeyey Ajendahii hortiillay wey suurtoobi weyday inay arrimaha qaarkood isku-waafaqaan, kolka waxay intooda badan ku soo riixeen Shirweynaha Madaxweynayaasha.

Taasi waxay keentay in shirkii 11aad ee Madaxweynayaasha habkuu u dhacay ka duwanaa sidii looga bartay shirkooda.

Maxaa wacay, meeshii looga bartay in odayaasha la horkeeno arrimo bislaaday oo ayaga laga rabay keliya inay oggolaadaan, ayaa ayaga dhexdoodii dooddii ka furantay oy qasab noqotay inay dhab u xaajoodaan, kana caddaato waxay isku diidan yihiin waxay isku waafaqsan yihiin, waxay dib u dhiganayaan iyo waxay hadda go'aan ka gaarayaan.

Habkaas dooddu u dhacaysay wuxuu la soo baxay wejiyo wax ku ool ah, wuxuuna soo ifbixiyey iimo fadhiyada jaadkaas ah xushmo la isu qabo awgeed aan ka muuqan jirin. Haddii aan tusaale ahaan u soo qaadanno qodobka faragelinta dawladaha shisheeyaha ah arrimaha u khaas ah Qaaraddan (waana mid asaasi ah, maxaa wacay, dhibaatooyinkii shalay

HALGAN

qaaradda yiilley iyo kuwa maanta ka aloosanba waxay salka ku hayaan faragelintaas) wuxuu noqday mid aad looga dooda la iskuna mari waayey. Macnuhu waxaa weeye in madaxda aad u dareensanayd ahmiyadda arrintaas, laakiin, ayaan darro, dawlad waliba ama koox dawladeedba, ayada oon diiddanayn in shisheeyuhu dhami Ciidammadiisa kala baxo qaaradda, ayey haddana siinayeen turjumaad khaas ah oo la xiriirta xaaladda dalkooda ama gobolkooda.

Walowse dooduhu saas u dhacayeen haddana waxaa la gaaray go'aan ah inay dawladaha qaaraddu ka fikiraan, awoodna u yeeshaan siday xilka ka saaran daafaceeda, nabadgelyadeeda u sugi lahaayeen. Xaaladda Geeska Afrika markii la soo qaaday, way u caddayd madaxda inay qallafsan tahay, khudbado keliyana inaan lagu dhammeyn karin. Dawladda Xabashidu waxay halkaa isku dayday, siday weligeed samayn jirtey, iney waxa dhibaato, hoog iyo dagaal meesha yaalla ay u rogto

khilaaf xudduudeed oo ayada iyo JDS dhexyaal. Runtii ka badan ciiddaa misaalkeed intey JDS ka warbixisay qaddiyadda dadka Xabashidu gumeysato Geeska Afrika, halgankoodii dheeraa iyo faragelinta ciidammada Kuuba iyo Midowga Soofiyeeti ay rabaan iney arrinta ku muquuniyaan, gaar ahaan waxay ku dadaashay muddo badan iney adduunweynaha runta ugu sheegto sida ay u kala fog yihiin khilaafaadka xuduudaha ee dhowr dawladood oo Afrikaan ah dhexyaal, kaa oo Madaxda qaaradda lagu xuuxiyo iyo baaxadda uu leeyahay halganka gobonimodoonku ugu jiraan madaxbanaanidooda iyo aaya ka talintooda.

Waxaa muuqatay in arrinta culayskeeda madaxdu garatay, waana tii la soo jeediyay in degdeg wax looga qabto (Ciidamada Soomaaliyeed iyo kuwa Xabashida oo mid walba xudduudiisa 5 Km dib ugu laabato, tabaabusheysiga dagaalka oo la joojiyo, Guddigii niyad-samida ee UMA oo shaqadiisii sii wata iwm) si loo baajiyo dhibaato ka sii dhex-dhacda labada dawladood oo deriska ah.

Waxaase haray iney Afrika geesinnimo iyo waaqicinnimo u food saarto salka dhibaato: Gumeysiga madow ee Xabashidu ku haysato shucuubta Soomaali Galbeed, Abbo iyo Ereteriya. Shaki waxaan lahayn haddii ay Afrika aqoon u lahaan lahayd dabeecadda gumeysiga Xabashida sida ay ugu leedahay midka Koonfur Afrika, siday kaa u cambaareyso, ay uga dagaallanto ay kaana ka yeeli lahayd.

Labadaas Gobol intey ka xoroobaanna way adkaan doontaa sidii ay xoogagga shisheeyuhu gabbood u waayaan oo ay ummuuraha Qaaradda faraha uga laabtaan.



Kaalinta Hoggaamineed ee Xisbiga iyo Xiriirka Ururrada Bulshada

DAAHIR WARSAME

Halgan dhaqdhaqaaqa Gobanimadoonka Soomaaliyeed wuxuu ka soo gudbay marxalado badan oo u jeeda xaqiijinta himilooyinka madaxbanaanida, midnimada iyo horumarka bulshada Soomaaliyeed.

Kacaankii 21kii Oktoobar 1969, oo ay dhaliyeen Ciidamada qalabka sida oo uu hoggaaminayo Jaalle Maxamed Siyaad Barre, wuxuu muujiyay baahida loo qabo laba-kacleynta halganka Gobanimadoonka Soomaaliyeed oo la tallaabo qaadayo waayaha cucub.

Kacaanku wuxuu warqadii 1aad iyo tii 2aad si cad ugu qeexay lagamamaar maanimada xaqiijinta himilooyinka dadweynaha Soomaaliyeed oo ah Madaxbanaani, midnimo, qaranimo iyo horumar bulshadeed, wuxuu Kacaanku qaatay Hantiwadaagga Cilmiga ah isagoo u arkay jidka kaliya ee lagu gaadhi karo horumar deg deg ah, lagu dhiso karo bulsho cusub oo ka madhan qaabka isku dulnoolaadka oo idil.

Mudadii 9ka sano ahevd ee Kacaanku dalka taladiisa maamulayey wuxuu soo hooyay guulo waaweyn oo dhinac walba ah. Abaabulka, kicinta, hanuuninta iyo kor u qaadidda garaadka siyaasadeed ee dadweynuhu waxey ka mid aheyd tallaabooyinkaas waa. weyn ee laxaqiijiyay, loogana jeeday in dadweynaha laga qayb geliyo talada dalka, taas oo keentay asaaskii XHKS iyo Ururadiisa bulshada.

Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, isagoo arrintaas ka hadlayana wuxuu yidhi, «Haddaa duruufto u bisishahay hirgelinta taliska dadweynaha, Kacaankuna mudadii uu jiray ku dadaalay xaaqiijinta arrintaas».

Haddaba XHKS, isagoo gacanta ku hayo awoodda hoggaamineed ee bulshada Soomaaliyeed qorshahaas oo Xisbigu ku guddoomsaday Shirweynihiisii 1aad ee 1dii Luulyo 1976.

Sidaas darteed, waxaa ku waajib ah inuu sugo hoggaaminta toosan ee hawlaha qaranka isagoo ka duulaya aragtida cilmiga ah ee hantiwadaagga, indhahana ku hayo waayaha u gaarka ah Ummadda Soomaaliyeed.

Waxaa halkaas ka soo ba. xeysa baahida loo qabo in hay'adaha Xisbiga, Ururada bulshada iyo dhammaanba xoogagga horusocodka ee dalku xil weyn iska saaraan xoojinta xidhiidhka ay la leeyihiin dadweynaha, si joogta ahna u fuliyaan Barnaamijka, Xeerka Xisbiga iyo Go'aanadiisa.

Xisbiga HKS, oo lagu tilmaamo inuu yahay Xisbiga nooca cusub ah, waxaa mabda' nololeedkiisa asaasiga ahi yahay inuu si joogta ah ugu dhex noolaado dadweynaha, xidhiidhka uu la leeyahay aad u xoojiyo.

Jaalle, Lenin oo isaga looga tusaale qaato marka laga hadlayo Xisbiga nooca cusub ah, isagoo ka hadlaya xidhiidhka Xisbigu la leeyahay dadweynaha wuxuu si fiican u qeexay qodobada soo socda:-

- In si qota dheer Xisbigu ugu dhex noolaado dad. weynaha.
- Inuu ogaado afkaartiisa.
- Inuu ogaado wax kasta oo ka jira bulshada dhexdeeda.
- Inuu garasho fiican u yeesho bulshadu waxey qabato iyo sada ugu fiican ee uu ula macaamiloon karo.
- Inuu u dagaalamo siduu kalsoonida dadweynaha u kasban lahaa.

Barnaamijka XHKS, isagoo ka hadlaya kaalinta hoggaamineed ee Xisbiga iyo xidhiidhka adag ee uu la leeyahay dadweynaha wuxuu qorayo: "Dhalanteed iyo Riyo ayey ahaan laheyd haddii loo qaato in Xisbigu kaligii dhisi karo bulsho cusub.

Hantiwadaagga waxaa la dhisi karaa oo keliya marka dadweynuhu raacsan yahay Xisbiga. Haddaba si loo fuliyo gebi ahaanba waajibaadka xisbiga ee dhismaha hantiwadaagga, wuxuu xisbigu cuskanayaa xoogagga horusocodka ee Soomaaliyeed sida: Sha.

qaalaha, Dhallinyarada, Beeraleyda, Raacatada, Ciidamada qalabka sida iwm. Xoogga Xisbigu wuxuu ku jiraa kuna xidhan yahay hadba sida loogu xidho dadweynaha.

Xisbigu wuxuu hoggaamiyaa dadweynaha iyaguuna cuskadaa oo sal u ah, iyadoo uu u soo marayo Ururrada Shaqaalaha, Dhallinyarada, isla markaasna si adag ayuu xidhiidh ula leeyahay hay'adaha dawladda»

Sidaasaa Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed u yahay hoggaamiyaha Ururrada bulshada iyo dadweynaha intiisa kaleba. Xis_ bigu isagaa dejiya habka siyaasadeed ee toosan, isagaa jiheeya waajibaadka ay kala leeyihiin Ururada Bulshadu, isagaa isu duwa hawlahoodada, isagaa xisbigu Ururrada siiya xoogga ay ku shaqeeyaan, maxaa yeelay, wuxuu u soo xulaa Ururrada bulshada hawlwadeennada xisbiga kuwa ugu firfircoon.

Sidaas darteed, Xisbigu mar hadduu yahay Ururka Siyaasadeed ee kaliya ee ka jira dalka, taladiisana maamulaya, kana tarjuma danaha dadweynaha oo dhan, wuxuu mudan yahay hoggaaminta shaqada iyo hawlaha Ururrada bulshada iyo hayadaha Dawladda.

Hadda iyadoo halganka dhiifoon ee Ummadda Soomaaliyeed ugu jirto xaqiijinta himilooyinkeeda uu galay marxalad tayeed cusub oo ka dhalatay waayaha cusub ee dalka, Gobolka aynu ku nool nahay iyo Adduunka guud ahaan ka jira.

Waayahaas oo sameeyey xowligii uu ku socday halganka kacaanka, xidhiidhkii caalamiga ahaa ee aynu la lahayn xoogagga adduunka, kaalinta hoggaamineed ee Xisbiga HKS, niyadda vax qabadka Ururrada bulshada iyo qaybaha kala geddisan ee bulshadeenna ayaa si haddaba looga gudbo marxaladda adag ee Kacaanku marayo, loona xalliyo dhibaatooyinka maanta xisbiga horyaalla, xowligii kacaanka ku socday u labakacleeyo, loona sii xididda dheereysiiyo isbeddelkii bulshadeed ee kacaanka waday, loogana adkaado dhammaan xoogagga dibusocodka ah ee iyagoo isticmaalayo qaabab kala duwan laakiin isku duluc ah ee isku dayaya inay kufivaan Kacaankii 21kii Oktoobar; Si loo xoojiyo midnimada Ummadda iyo isbahaysiga xoogagga horusocodka ah, waxaa lama huraan ah in xis_ bigu diraasad iyo falanqayn goto dheer ku sameeyo waayaha Ummadda Soomaaliyeed mareyso maanta, dibna u habeeyo hawlihiisa abaabul, hoggaamineed, kormeer, xisaabtan, sixid iyo wax qabad. Waxaa haboon in hoggaanka xaqiijinta barnaaxisbigu xeerarkiisa iyo mijkiisa ku habeeyo in uu qanciyo, barbaariyo, hawl geliyo, kor u qaado garashadiisa siyaasadeed, dhiirigeliyo abuurka, tixgeliyo talada iyo warbixinta hayadaha xisbiga, Ururrada bulshada dadweynaha. Isla markaasna laga digtoonaado in aan hay'adaha xisbigu qaadan kaalinta Ururada bulshada oo aaney dulsaarin culeys aan loo baahnayn oo hakiya si habsan u fulinta hawlahooda, oo ay gacan qabtaan, koriyaan, u fidiyaan gacan buuxda, una fududeeyaan gudashada waajibaadka loo xil saaray, isla markaasna waa in xisbigu si toosan isugu duwo una kala habeeyo hawlaha hoggaamineed ee xisbiga tan dawladda, si fiicanna loo kala qeexo waajibaadka Xisbiga, dawladda iyo Ururada Bulshada.

Sidoo kale waxaa iyana Ururada bulshada: Shaqaalaha, Dhallinyarada, Haweenka iyo Iskaashatooyinka iyo dhammaan xoogagga kale horusocodka ahaa waajib culus ka saaran yahay iney ka soo dhalaalaan xilka taariikhiga ah ee xisbigu ku aaminay.

Ururada bulshadu waa kanaalada aan gudhin ee Xisbigu u soo maro dadweynaha intiisa kale, waa xidhiidhayaasha dhabta ah ee xisbiga ivo bulshada, waa baalasha uu ku duulo Xisbigu, waa dheg nugal ugu xoogga bulshada urursan ee ugu ah fuheeganka u linta shardi la'naaeed ee baa qa iyo tusaalooyinka Xoghayaha Guud ee XHKS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Go'aannada Golaha Dhexe iyo Guddiga Siyaasadda, Dawladda, iyo Barnaamijka iyo xeerka XHKS, iyo himilada Kacaankii 21kii Oktoobar 1969.

Jaalle Siyaad, oo aan la soo koobi karin tilmaamuhu ka baxshay xidhiidhka xisbiga iyo Ururrada Bulshada iyo kaalinta Ururradu kaga Jiraan Siyaasadda Xisbga, wu xuu ku sifeeyey Shaqaalaha Soomaaliyeed inay yihiin «Lafdhabartii Kacaanka», Dhallinyaradana wuxuu ku sifeeyey «Kaydka iyo Kaaliyaha ugu firfircoon ee Xisbiga».

Haddaba inkastoo Ururada bulshada muddadii yarayd ee ay dhisnaayeen ay u soo galeen halgan qadhaadh oo aan kala go' lahayn, dhismaha iyo taaba gelinta xilkooda ururnimo, fulinta siyaasadda xisbiga, taakuleynta halganka dhaqdhaqaaqa gobannimadoonka Soomaaliyeed, xoojinta iyo horumarinta xidhiidhka saaxiibtinimo iyo iskaashi

(Eeg Bogga 10aad)

NOLOSHA XISBIGA



Kalfadhigii 2aad ee Guddiga Dhexe U. DH. K. S

4-7dii Luulyo Magaalada Xamar waxaa ka dhacay shir taariikhi ah, oo lagu qabtay Xarunta Dhexe ee Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed. Wuxuu ahaa shirkii ugu horreeyey ee noociisa ah taariikhda dalkeenna (Dib baan ka fasiri doonnaa). Wuxuu ahaa kal-fadhigii 1aad ee Guddiga dhexe UDHKS. Guddiga dhexe waa hay'adda ururka ugu sarraysa muddada dhowrka sano ah ee u dhexaysa labada shirweyne, Lama oran karo, haddii la yiraahdana sax ma aha, UDHKS waa ururkii ugu horreeyey ee ay yeelato dhallinyarada Soomaaliyeed. Dhallinyaradeennu way haan jirtay ururro, tayadoodu waxay doonto ha ahaatee. Kii ugu qiime badnaa wuxuu ahaa Naadigii Dhallinyarada Soomaaliyeed (S.Y.C.) ee la asaasay 1943kii, ka dibna isu beddelay urur siyaasi ah (S.Y.-L.) Laakiin waxaa la oran karaa U.DH.k.S. waa kii ugu horreeyey ee noociisa ah, marka

laga eego Xubnaha uu ka kooban yahay, qaabka uu u dhisan yahay, Xeerka u degsan Barnaamijka uu ku shaqaynaayo.

Ururku markuu hal sano iyo 46 beri jirsaday, ayuu guddigiisa dhexe isugu yimid fadhigii ugu horreeyey. Sida la ogyahay, ururka waxaa rasmi ahaan loo dhisay 15kii Maajo 1977kii. Muddadaas iyada ah, hawlaha ururka waxaa si toos ah u soo waday Guddiga fulinta ee ah hay'adda guddiga dhexe ka wakiilka ah muddada u dhexeysa labada Kal-fadhi.

Ka dib markii uu shirka furay guddoomiyaha ururku, Jaalle Maxamed Maxamuud Warsame, guddiga fulintu wuxuu u soo jeediyey war-bixin tifaftiran oo ku saabsan hawlihii la soo qabtay muddadii ururku soo dhisnaa. Warbixintu waxay ku salaysanayd qorshihii lagu tala galay, wixii



ka fulay, wixii fuli-waayey, sababaha hakiyey iyo qorshaha cusub ee loo baahan yahay in fadhiga lagu falanqeeyo, laguna guddoonsado.

Guud ahaan hawlahaas laga warbixinayey, waxay u kala qayb sanaayeen dhinacyada kala ah:

- Abaabulka guud ee ururka
- 2. Hawlaha la xiriira dhaqaalaha iyo maamulka
- 3. Tababarrada, kicinta iyo hanuuninta
- 4. Ka qayb qaadashada hawlaha dhismaha iyo difaaca dalka



Warbixintaas guud ee guddiga fulinta ka sokow waxaa iyaguna fadhiga warbixinno u soo jeediyey Wakiillada Ururka ee Gobollada, Xoghaynta dhallinta shaqaysa iyo Xoghaynta ardada Jaamicadda Ummadda. Warbixinahaasoo dhan dabeecaddoodu waxay ku salaysnayd sidii aan ku soo sheegnay warbixintii guddiga fulinta.

Fadhiga waxaa horyiil ajeenda ballaaran oo hawlo waaweyn xambaarsan. Taasna waxaa keenay isagoo ahaa fadhigii ugu horreeyey ee guddiga dhexe, waqtigiisiina ka dib-dhacay, duruuf gaar ah awgeed; iyo ururka oo hawlihiisu cusub yihiin welina ka gudbin heerkii dhismaha waaya-aragnimadii sannadka ahaydna muujisay arrimo dib-uhabayn u baahan.

Waxa loo baahday in dib loo habeeyo Xeerka ururka, lana sameeyo xeer-nidaamiye lagu sii faahfaahiyo. Waxa kaloo guddiga dhexe horyiil dib-uhabayn lagu samaynayey guddiga fulinta, iyadoo la buuxinayo laba xubnood oo ka bannaanaatay, iyo in Waaxaha loo magacaabo Kaaliyeyaal ka tirsan guddiga dhexe. Waxaa iyana ajeendaha ku jirtay in la dejiyo qorshaha shaqada ururka lixda bilood ee soo socoto.

Qodobbadaas iyaga ah, mid walba waxa ka furantay dood dimuqraaddi ah. Xubin kastoo guddiga dhexe ka mid ah, waxaa uu ra'yigiisa u dhiibanayey si tifaftiran, iyadoo laga shidaal qaadanayey mabda'a dhaliilka iyo isdhaliilka ee ka mid ah mabaadi'da Ururka ku shaqeeyo.

Qodobbada ahmiyadda culus ee sida xeerka iyo xeer-nidaamiyeyaasha, mid walba waxa loo saaray guddi hoosaad ka soo baaraandego, ka dibna shirka mar labaad soo hordhiga, si loo tifaftiro, loona guddoonsado.

Meelaha xeerka laga naaxiyey waxay u badan yihiin xagga mabaadi'da guud ee ururka, awoodda guddiga dhexe iyo guddiga fulinta, xilka xoghaynta dhallinta shaqeysa iyo xoghaynta Jaamacadda

Dibu-habayntii guddiga fulinta iyo xubnihii lagu kordhiyey, waxa la isku raacay in ay noqoto sida hoos ku qoran:-

- Jaalle Cismaan Warsame Saalax waxaa loo doortay inuu noqdo Xoghayaha Waaxda xiriirka dibedda.
- 2. Jaalle cismaan Maxamuud Xaashi waxaa loo doortay xoghayaha Waaxda Fanka iyo Isboortiga.
- 3 Jaalle Nuur Fiqi waxaa loo doortay Xoghayaha Waaxda Dhaqaalaha.
- 4. Jaalle Xaliima Sheekh Maxamuud waxaa loo doortay Xoghayaha Waaxda Arrimaha Ururka Xubinaha kale ee guddiga fulinta, waa sidoodii hore.

Guddiga kormeerka iyo baarista waxaa dib loogu habeeyey sida soo socota:-

- Jaalle Cali Aadan Saalax Guddoomiye.
- 2. Jaalle Cabdicasiis Xaaji Maxamed — Guddoomiye ku xigeen.
- 3. Jaalle Xaliimo Muuse Maxamuud — Xubin.

Kaaliyayaasha Waaxaha waxa loo doortay Jaallayaasha hoos ku qoran:

1. Waaxda Arrimaha Ururka Jaalle Xuseen Macow.

- 2. Waaxda Abaabulka Jaalle Cali Weheliye Jamcaale.
- 3. Waaxda Aydiyoolojiyada Jaalle Cabdulqaadir Cigaal iyo Jaalle Axmed Maxamed Xasan.
- 4. Waaxda Xiriirka Dibedda Jaalle khaliif Cabdiraxmaan.
- 5. Waaxda Fanka iyo Isboortiga Jaalle Maxamed Daahir Afrax iyo Jaalle Maxamed Calasow Caddaawe.
- 6. Waaxda Xarumaha waxbarashada Jaalle Ibraahim Axmed Afrax iyo Dr. Cabdicasiis Shariif.
- 7. Waaxda Dhaqaalaha Jaalle Maxamed Abuukar Mayow.
- 8. Waaxda Dhallinta shaqeysa — Jaalle Xasan Nuur Faahiye.
- Waaxda Birigaatada Jaalle Cali Cilmi Maxamed.
- 10. Waaxda Ubaxa iyo Dhallinta Kacaanka Jaalle Maxamed Harakow.

Fadhiga 1aad ee Guddiga Dhexe ee Ururka Dhallinyara-Soomaaliyeed da Kacaanka wuxuu ku soo beegmay xilli gaar ah; Xilli loo dabbaaldegaayey sannadguuradii 18aad ee ka soo wareegtay madaxbannaanidii iyo midowgii laba gobol oo ka mid ah shantii qaybood ee gumeystayaashu dalkayaga u kala jabsadaan. Waxa kaloo lagu jiray xuskii sannadguuradii labaad ee asaaska Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed. Ururka dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed waxa dhalay XHKS isaga ayuuna u yahay kaydka iyo Kaaliyaha ugu firfircoon. Sida awgeed xuska sannad-guurada 2aad ee dha-

200

noonito, ioio

lashada Xisbiga, UDHKS waxay ugu faadhidaa qiime weyn

Dhanka kale haddii laga eego, waa xilli Taariikhda ummadda Soomaaliyeed ay marayso marxalad adag, oo halgan qaraar loogu jiro la dagaallanka gumeysiga iyo dibu dhaca iyo sugidda qaranimada Soomaaliyeed. Waa xilli imberyaaliyada, gumeysiga iyo inta u adeegaysa, gudaha iyo dibeddaba ay maleegayaan shirqool la doonaayo in lagu kala dhantaalo, gobannimada, midnimada iyo horumarka um. madda Soomaaliyeed. Xoogagga Kacaaneed ee horusosodka Soomaaliveed avna u taagan yihiin ka hortagidda shirqoollada iyo xaqiijinta himilooyinka Ummadda.

Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed, oo safka hore uga jira xogaggaas kor ku tilmaaman Kalfadhiga Koowaad ee guddigiisa dhexe wuxuu ka dareeraayey, hawlihiisuna ku salaysnaayeen halgankaas taariikhiga ah; sida ku cad kalfadhiga ka soo baxay.

Baaqu wuxuu daboolka ka qaadayaa, dhallinyarada Soomaaliyeed ee Kacaanka ahi sida indhafurraanta iyo feejignaanta ah ee ay la socdaan dhaqdhaqaaqa isbeddelka xiriirka siyaasadeed ee caalamiga ah, ee u xaglinaaya dhinca dadyowga u halgamaaya xornimada iyo dimuqraadiyadda. Baaqa waxaa ka muuqata aragti dheerida Ururka Dhallinyaradu ku qiimaynayo marxalad-tayeed ka ummaddeennu marayso iyo sida dhallinyaradu heegan ugu tahay nafu huridda iyo ka lib-keenidda himilooyinka kacaaneed ee dadweynaha Soomaaliyeed.

Baaqu wuxuu tebinayaa taageerada hiil iyo hooba leh ee dhallinyarada Soomaaliyeed

garab taagan tahay Jabhadaha Soomaali Galbeed iyo Abow ee u dagaallamaya sidii ay dadweynaha Soomaaliyeed ee halkaas ku nool uga xorayn lahaayeen gumeysiga Taliska Xabashida. Waxay kaloo dhallinyaradu taageeraysaa dadyowga Afrikaanka ah, iyo kuwa Carbeed ee madaxbannaanidooda u dagaallamaaya kuwaasoo ay ka mid yihiin: Zimbobwe, Koonfur Afrika, Namibiya, Eretereya, iyo Falastiin, iyo dhammaan dadyowga dunida ee u halgamaaya xornimada iyo dimuqraadiyadda

Gabagabadii fadhiga, waxa ka soo qayb galay xildhibaanno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS, waxaana magacooda khudbad bogaadin iyo dardaaran ah dhallinyarada ugu soo jeediyey Guddoomiyaha Hoggaanka Abaabulka Golaha Dhexe XHKS, Jaalle G/Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed. Jaalle Cabdulgaadir wuxuu guddiga dhexe ee UDHKS ku bogaadiyey ammaan ballaaranna ugu soo jeediyey habkii hoggaaminta iyo socodsiinta shirka oo uu tilmaamaayey in ay ka muuqatay waaya aragnimo iyo bisayl siyaasadeed ee heer sare ah, taasoo ay deris ku dayasho leh ka gaadan karaan ururrada bulshada intooda kale.

Jaalle Cabdulqaadir wuxuu dhallinyarada ku baraarujiyey in ay u diyaar garoobaan, isuna hubeeyaan la wareegidda hoggaaminta Ummadda, mustaqbalka soo socda; iyagoo uu dusha ka saaran yahay xilka weyn ee u horseedidda mustaqbalka aayatiin wacan leh.

Waxaa xusid mudan xammaasaddii iyo xisihii aan caadiga ahayn ee si joogta ah uga muuqatay jawiga shirka muddadii afarta beri ahayd ee uu socday, intaasoo fadhiyada badankooda, sidii subaxdii loo fariisto saqda dhexe habeennimo lagu gaarayey; haddana ma ahayn wax lagu daalayay, waayo xubnaha guddida dhexe ayaa qiimaynayey xilkooda culus, arrimaha laga hadlayey oo xiisa lahaa, doodda iyo habka hoggaaminta shirka oo ku socotay jawi jaallanimo oo dimoqraadiyad ku dhisan iyo dambeynta heeso dhextaal ah oo dhiigga dhaqaajinaya, kuwaasoo ay mar walba isku baraarujinayaan xubnaha shirku Waxaa iyana xoogga heesaha iyo baraarujinta qayb lixaab ka qaatay ubaxa kacaanka Oktoobar oo kaalintii ay shirkaas oo kale ka qaadan jireen, sidoodii iyo si ka wanaagsan uga soo baxay.

UDHKS, waxaan u rajaynaynnaa in uu ku guulaysto dhaqan gelinta qorshaha uu degsaday iyo ballanta uu ummadda ka qaaday.

Dammaashaadyadii Xuska Ida Luulyo

Ummad kasta taariikhdeeda waxa ku jira maalmo waaweyn oo xasuus lama illaawaan ah leh. Waa maalmaha ay ku soo beegmaan dhacdooyinka muhiimka ah, ee isbeddelka weyn ka sameeya socodka bulshada. Maalmaha waaweyn ee shacbiga Soomaaliyeed ku dhaato, waxaa ka mid ah 1da Luuliyo. Waa maalintii

gobollada Koonfur ee dalkeennu ka xoroobeen gumaysigii talyaaniga (Idii Luuliyo, 1960 kii), waa maalintii ay midoobeen labadii qaybood, koonfur iyo Waqooyi, isla markii ay ka madaxbannaanaadeen gumeytayaashii Ingiriiska iyo Talyaaniga. Waa maalintii uu dhashay xisbiga hantiwadaagga Kacaanka Soomaali.

Cidna kama dahsoonaa qiimaha ay qof kastoo Soomaali ah ugu fadhido mid kastoo ka mid ah saddexdaas munaasabadood. Madaxbanaanidu, waa arrinta ugu qaayo weyn ee ay halgankii ugu adkaa u soo galeen ummadihii gumeysiga lagu qabsaday, ee aan ka

yeed (1dii Luulyo, 1976kii).

soo galeen ummadinii gumeysiga lagu qabsaday, ee aan ka midka nahay. Midnimaduna waa arrin la'aanteeda gobannimadu dhalanteed noqonayso khatarna ku suganaanayso. Dhalashada XHKS waxay ahayd laba kaclayn uu sameeyey Kacaankii 21ka Oktoobar ee soo celiyey sharafkii Umma-

dda Soomaaliyeed.

Haddaba, maalintaas kulmisay saddexda munaasabadood ee waaweyn, dalkeenna sannad walba waxa looga sameeyaa damaashaad iyo dabbaaldegyo lagu xushmaynaayo Sannadkaan 1978ka, waxyaalihii ugu waaweynaa ee munasabaddaas lagu xusay waxaa ka mid ahaa kuwa hoos ku qoran:-

XAFLAD LAGU QABTAY MASRAXA WADDANIGA AH

Habeennimadii 30ka Juunyo, Masraxa waddaniga ah (Golaha Murtida iyo Madadaalada) waxaa lagu qabtay xaflad weyn oo lagu maamuusaayey sannad-guuradii 18aad ee gobannimada iyo israaca gobollada waqooyi iyo koonfur. Xafladdaas oo heer sare ahayd, waxaa ka soo qayb galay Xoghayaha Guud ee XHKS, Madax. weynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre, Xubnaha Guddiga Siyaasiga ah ee XHKS, Xildhibaanno ka tirsan Golaha Dhexe XHKS, Saraakiil Sare oo ka tirsan Xisbiga, Dawladda iyo Ururrada bulshada Danjirayaasha Dalkeenna u jooga dalalka Shisheeyaha iyo dadweyne aad u fara badan.

Ugu horrayntii waxaa la daawaday Riwaayad ay soo ban-

dhigeen Hooballada Waaberi; Riwaayaddaas oo la magac baxday «Taariikh lama illaawaan» waxay ka warramaysay taariikhdii halganka gobannimadoonka Soomaaliyeed iyo guulihii laga soo hooyey. Waxay ahayd Riwaayad heer sare ah oo ay si weyn ugu riyaaqeen dadkii daawashadeeda ka soo qayb galay.

Ka dib, waxaa halkaas khudbad taariikhi ah ka soo jeedi-Xoghayaha Guud ee yey XHKS, Madaxweynaha JDS Jaalle Maxamed Siyaad Barre. Xoghayaha Guud ee XHKS. khudbaddiisaas qiimaha lahayd, wuxuu ku bilaabay, hambalyo uu u jeediyey ummadda Soomaaliyeed, oo meel kastoo ay joogaanba uu ugu hambalyeeyey munaasabaddaas qaayaha leh; ka dibna wuxuu u gudbay falanqeyn ballaaran oo uu ku sameeyey halgankii ummadda Soomaaliyeed soo gashay ee qeyba ka mid ahi ku gobannimadooda, hanteen qaar kalena wali sii wadaan dagaalkii ay ugu jireen madax bannaanidooda. Jaalle Siyaad wuxuu ku dheeraaday arrinta shacbiga Soomaaliyeed ee weli ku dambeeya gacanta gumaysiga, iyo sida JDS iyo guud ahaan dadweynaha Soomaali. yeed ula garabtaagan yihiin taageero hiil iyo hooba leh. Madaxweynuhu, markii uu qo dobkaas ka hadlayey, wuxuu aad ugu nuuxnuuxsadey xaaladda gallafsan ee maanta ka taagan Geeska Afrika, dhibaatadaas oo uu abuurev gumeysiga xabashida iyo kuwa u garbaynaya; iyo waajibka ka saaran Ururka Midowga Afrika iyo dalalka Dhexdhexaadka ahba.

Xoghayaha Guud ee XHKS, wuxuu ka warramay labadii sano ee uu soo dhisnaa xisbigu, heerarkii uu soo maray, sidii uu u soo dhismey, dalkoo dhanna ugu baahay iyo tallaabooyinkii uu soo qaaday. Jaalle Siyaad wuxuu carrabka ku dhuftay, labada sano oo Xisbigu soo jiray in ay tahay muddo, da' ahaan aad u yar, laakiin, tijaabooyinkii Xisbiga soo foodsaaray, marka laga eego, waxay ahayd mid aad u culus.

Waajibaadkii ugu horreeyey ee Xisbigu is-hordhigay, waxaa ka mid ahaa, sidii ay u dhismi lahaayeen ururrada bulshadu ee ah tiirarka uu ku taagan yahay Xisbigu iskuna xira isaga iyo dadweynaha; iyadoo la tixgalinaayo XHKS inuu yahay Xisbi nooca cusub ah, ee ku tiirsan dadweynaha.

Bilihii hore ee sannadkii 1977kii, waxaa dhismay Xiriirka guud ee ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed iyo ururka Dimoqraadiga ee Haweenka Soomaaliyeed. Ka dibna waxaa dhismay, Ururka guud ee Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Jaalle Siyaad, wuxuu xusay dulucda barnaamijka xisbiga iyo nolosha loogu dhaqan galinayo, hawlwadeennada, iyo xubnaha xisbiga iyo ururrada bulshadana, wuxuu ku booriyey, inay kordhiyaan dadaalkooda, korna, u qaadaan aqoontooda.

Ugu dambayntii, Madaxweynuhu wuxuu ummadda Soomaaliyeed ugu baaqey in ay kordhiyaan feejignaantooda, midnimadana adkeeyaan.

XAFLADO DAWEYNE

Dhammaan xafladaha magaalooyinka dalka, waxa lagu qabtay xaflado qiimo leh oo ay isugu yimaadeen dadweynaha xaafadahaas deggan, iyagoo wajiyadooda farxad iyo

raynrayni ka muuqato, cayaarihii hiddaha iyo dhaqankana ku damaashaa-Dadweynaha xaafadaya. farxaddoowaxaa daha. daas kala qayb galaayey madaxdii xisbiga XHKS ee halkaas joogta; waxaana ay u jeedinaayeen khudbooyin ay uga warramayaan qiimaha saddexda munaasabadood, ee ku kulmay 1da Luulyo.

Golayaasha hanuuninta ee xaafadaha ay ka kooban yihiin degmooyinka gobolka Banaadir xafladihii lagu qabtay habeennimadii 1da Luulyo, waxaa dadweynaha kala qaybgalay, khudbana uga jeediyey hawlwadeennada xarunta dhexe XHKS, oo ka warramay halgankii dheeraa

ee Ummadda soomaaliyeed ay la soo gashay gumeysiga, halgankaasoo guulo waaweyn laga soo hooyey 26kii Juunyo, 1960kii, 1dii Luulyo, 1960kii, 21kii Oktoobar 1969kii iyo mar kale 1dii Luulyo 1976kii.

Isla markaas, hawlwadeennada xarunta dhexe, waxay dadweynaha ku guubaabinayeen, halgankii in uu weli socdo, loona baahan yahay in loo jilib dhigo.

Xafladahaas ka sokow, dadweynuhu waxay maalmahaasoo dhan iskood waddooyinku iyo bannaanada ugu dabbaal degayeen ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka, magaalooyinkana, waxa lagu qurxiyey nalal midab leh iyo calammo kala jaad ah.

Habeenkii 30ka Juun, fagaarayaasha waaweyn ee magaalada Muqdisho, waxaa isugu soo baxay boqollaal kun oo ka mid ah dadweynaha magaala-madaxda iyo agagaarkeeda deggan. Haalkaas, waxaa dadka ku maaweelinnaayey, ilaa saqdii dhexe, kooxaha waaweyn ee fannaaniinta ah; dadweynaha qaarkoona iyagaa iskood cayaaro iyo damaashaadyo kale isugu maaweelinaayey.

Intaas oo dhammi waxay na tusaysaa sida dadweynaha Soomaaliyeed u qiimaynayaan, uguna dhaadanayaan, maalmohooda taariikhiga ah; taasoo ka marag kacaysa gobannimo jacaylka iyo waddaninimada shacbiga Soomaaliyeed.

(Ka Yimid Bogga 5aad)

ga ee ay la leeyihiin Ururrada iyo xoogagga horusocodka ee dunida, iyo guud ahaanba si dhiifoon uga qayb qaadashada halganka taxanaha ah ee Kacaanku ugu jiro dhismaha iyo horumarinta dhinacyada kala duwan ee nolosha bulshada Soomaaliyeed ee cusub.

Haddaba, waxaad mooddaa in aan weli fari ka qodnayn halgankaas isaga ah, ee loo baahan yahay inay ururrada bulshadu iyagoo sii habeynaya hawlahooda ururnimo, xoojinaya xidhiidhka iyaga u dhexeeya, sii adkaynaya xidhiidhka qotada dheer ay la leeyihiin hay'adaha XHKS ee kala duwan iyo wax wada qabsiga iyo iskaashiga ka dhexeeya xoogagga kale ee horusocodka ah: sida Ciidammada Qalabka Sida, raacatada, indheergaratada, ganacsatada yaryar iwm, ka shidaal-qaadanaya tusaalooyinka Xoghayaha Guud ee Xisbiga Jaalle,

Siyaad, iyo go'aannada Golaha Dhexe, barnaamijka Xisbiga mabaadiida Kacaanka Oktoobar ayaa loo baahan yahay inay laba-laabaan waxgabadkooda Kacaaneed ee ay kaga qayb qaadanayaan halganka qadhaadh ee taxanaha ah haddana galay waayaha cusub oo xisbigu ku hoggaaminayo Ummadda Soomaaliyeed si loo xaqiijiyo himiloo. yinka taariikhiga ah ee bulshadu higsanayso, oo ah hanashada madaxbannaani iyo midnimo, garanimo iyo horumar bulsho oo ku dhisan aragtida cilmiga ee hantiwadaagga oo lagu dabaqayo waayaha u gaarka ah bulshada Soomaa liveed.

Inay olole iyo dagaal aan waan-waan lahayn ku qaadaan dhammaan xoogagga dibusocodka ah iyo canaasirka kacaandiidka ah ee isu bahaystay inay leexiyaan, hakiyaan ama kufiyaan Kacaankii 21 Oktoobar.

Inay u halgamaan tirtirid-

da dhammaan hadhaaga iyo qaababka Musuqmaasuqa oo idil, sida qabiilka, xatooyada iwm.

In ay ilaaliyaan midhaha Kacaanka, siina horumariyaan.

Inay gowsdambetyada ku haystaan mabaadiida kacaanka Oktoobar, iyo barnaamijka XHKS oo ay halgan aan gabasho iyo gorgortan laheyn u galaan dhismaha bulshada cusub ee hantiwadaagga ah.

Inay ku dhexnoolaadaan, abaabulaan, i s k u n a dubaridaan oo kaashadaan dadweynaha, ku soo xidhaan xisbiga XHKS, si habeysan uga shaqeeyaan midnimada iyo iskaashiga hoggaanka, hawlwadeennada iyo xubnaha xisbiga iyo Ururrada bulshada iyo dhammaan xoogagga horusocodka iyo dadweynaha Soomaaliyeed ee horumarka jecel una halgamaya.

WARBIXINTA BISHA



Arday Qalin Jàbisay

Xaflad lagu qabtay golaha murtida ee Muqdisho bishii July 25dii, wuxu Xogha yaha Guud ee X.H.K.S Jaal le Maxamed Siyaad Barre, shahaadooyin Jaamacadeed ku guddoonsiiyey 148 arday oo ka qalin jebiyey sannadkan 1977-78, kulliyadaha kala duwan ee Jaamacadda Ummadda

Boqol iyo afartan iyo siddeedaas (148) arday, waxay ka kala qalin jabiyeen kulliyadda: Beeraha (28) xoolaha (27) Daawada (27) Injineeriyada (16) Kiimika da (15) Jeolojiyada (14) Sharciga (12) iyo dhaqaalaha oo ah (9) arday.

Madaxweynaha JDS Jaalle Siyaad oo munaasabadaasi khudbad ka jeediyey wuxuu ugu horreyntii ardaydaasi ugu hambalyeeyey guusha ay ka soo hooyeen halgankoodii waxbarasho, wuxuuna u rajeeyey in ay Cilmigaa ay barteen ugu faa'iideeyaan dalkooda iyo dadkooda intaba.

Jaalle Siyaad wuxuu kaloo ammaan ballaaran jeediyey Wasaaradda Tac liinta Sare. Madaxda Jaamacadda Ummadda iyo dawladda Talyaaniga 00 wax ka qaadatay dheeraad ahna muujiyey si dii waxbarashada Jaamacadda ay u noqon lahayd mid ka tarjumeysa ujeeddooyinkii uu Kacaanku ka lahaa abuurista Jaamacadda Dalka.



Madaxweynuhu ka warramay dhibaatooyin ka lagala kulmay abuuritaanka Jaamacadda taasoo uu sheegay in gumeysigu uu marar badan tusaale. vey inaysan suuragal noqon karin in dalka laga Jaamacad waddani ah hase veeshee, aanu guddoonsannay inaanu ka hirgalinno Dalka Jaamacad waddani ah, dhibaato kasta aan kala kulannee, annagoo ku ta. shanevno awooddeeda iyo isku kalsoonida shacbiga Soomaaliveed.

Jaalle Siyaad oo si gaal ah ula hadlayey jaamiciinta wuxuu yiri, «Cilmigu faa'iido ma leh haddaannu kuu dhalin miraha dalkaagu u baahan yahay».

Wuxuu ku adkeeyey in ay isbeddel horumar leh ku kordhiyaan bulshada Soomaaliyeed.

«Soomaaliya waxay lee

siyaadahay hoggaan iyo sad cad oo ku habaysan maskaxda Ummaddeeda dhaqaale iyo bulshaba taasoo ah habka hantiwadaag. ga ayuu yiri Jaalle Siyaad. Wuxuuna intaa raaciyay, in Hantiwadaagga mabda'a aynu u doorannay inaanu ku fushanno maskaxda Ummaddeenna kana gudub. no dhibaatooyinka na soo foodsaara isla markaasna uu yahay waddada qura ee dalka lagu gaarsiin karo horumar deg deg ah.

Jaalle Siyaad wuxuu Xisbiga H.K.S. ku tilmaamay bartilmaameedka ay ku hiranayso Ummadda Soomaaliyeed si ay ku gaarto himilooyinkeeda siyaasadeed, dhaqaale, horumar iyo midnimo wuxuuna caddeeyey in uu yahay habeeyaha talooyinka iyo halganka Ummadda.

Madaxweynaha J.D.S. Jaalle Maxamed Siyaad Barre wuxuu sheegay in kacaanku uusan marnaba ka leexanaynin dhabbihii caddaa ee uu jeexday maalintii uu dhashay ee ahayd 1969kii, kaasoo ah in qofkii same la yimaada wanaag lagu abaalmarinayo, qofkii xumaan iyo is-hortaag-dan Soomaaliyeed la yimaadana laga jiseynayo. "Waa in dagaal cad lagu qaadaa, lana baabi'iyaa jiritaankooda shaqsiyaadka yar ee iska dhigaya af-ha yeenka rasmiga ah ee waddanka ee afmiinshaarnima yaad.

Munaasbaddaasi waxaa ka soo qayb galay Madaxweyne ku xigeenka Jaalle S.Gaas Xuseen Kulmiye Afrax, iyo Jaalle S. Guuto Ismaaciil Cali Abokor wasiirro, hoggaamo, xildhibaannada Golaha dhexe XHKS. Macalimiin ka socotay Jaamacadda Ummadda iyo saraakiil sare.

Wareysigii Guddoomiyaha Hoggaanka Aydaloojiyada

Guddoomiyaha Hoggaanka Aydolojiyada Jaalle Maxamed Aadan Sheekh wareys uu la yeeshay Hay'adaha Warfaafinta (Press and Radiyo) bishii Luuliyo 26dii wuxuu yidhi; «Iyadoo Afrika uu kaga tegey isticmaarkii gumeysan jirey muddada badan dhibaatooyin xan niba horumarkeeda waxaaa Afrika waajib ah in ay furihii ay ku xallahavd khilaafaadka dhexyaala kuwaasoo maanta abuuray faragelinta shisheeye».

Jaalle Maxamed Aadan oo ka mid ahaa wafdigii Madaxweynaha JDS, le Maxamel Siyaad kana qayb galay shirkii 15aad ee Madaxweynayaasha Afrika, wuxuu kaloo caddee yey in dawladaha waaweyni iyagoo ka faa'iideysanaya khilaafaadka dalalka Afrika kuna fushanaya dano istraateeji ah ay si bareer ah u soo farageliyeen danaha u gaarka ah Afrika, wuxuuna tusaale ahaan u soc qaaday siyaabaha uu Ruushka iyo dawlado ka tirsan Yurubta Bari ay ugu dhardhigteen arrinta Gees. ka Afrika.

,«Faragelintaa cusubi waxay xitaa soo jiidday in kuwii hore u gumeysan jirey Afrika iyana damcaan inay Afrika dib ugu laabaan isticmaarkii ay ka soo xorowday, waxaana cuddunta dhi baatooyinka Afrika ay ahayd in soohdimaha oo uu isticmaarku xaashi korkeed ku jeexjeexay isaga oon u eegeyn una tixgelineyn degaanka iyo dadkii», ayuu yidhi Jaalle Maxamed Aadan.

Guddoomiyaha Hoggaanka Aydolojiyadu wuxuu carrabka ku dhuftay in shirkii dhowaan ku dhammaaday Magaalada Khartuum ay Madaxda Afrikaanku isla garteen in daafaca iyo ammaanka Qaaradda Afrika ay mas'uul ka tahay Afrika oo aan marnaba looga baahneyn cid kale inay soo farageliso.

Mar uu ka hadlayey Jaalle Maxamed Aadan siyaabihii uu shirkaasi u a kay arrinta Geeska Afrika wuxuu caddeeyey in markii ugu horreysay la sameeyey guddigii niyadsamida nadku markuu ahaa 1973kii iyadoo la gartay dhibaatad iyo khilaafaadka dhex yaalla Soomaaliya iyo Itoobiya oo aaya ka talinta Xabashidu ay gumeysanayso ay tahay mid loo baahan yahay inuu darso guddigaa si ka kooban siddeeda dal, isla markaana ay ka raan xal waara oo ah.

«Kacaanku tan iyo intii

la magacaabay guddigaasi wuxuu si weyn ugu dadaalay inuu gacan weyn geysto sidii xal loogu heli lahaa arrintaas, hase shee waxa mar waliba hortaagnaa xaalkaas sha la'aanta Xabashida iyo Madax adayga ay ku dooneyso in ay weli imbridoorwadato iyaddeeda ku sii dad u halgamaya in ay haatan hantiyaan madooda», ayuu caddeeyey.

Gudoomiyaha Hoggaanka Aydolojiyada oo sii baqaadaya arrintaasi xuu caddeeyey in ay muran madoon tahay in Xabashidu ay gumeysaneyso doonaya in ay ka hoos baxaan cadaadiskeeda, wuxuu u soo qaatusaale ahaan day hadalladii Mr. Bevin oo ahaa Wasiirkii Arrimaha Dibedda ee dalka Ingiriiska markii uu ka hadlayey qorshihiisii ahaa inay Xabashidu faraha ka qaaddo dhulka ay gumeysaneyso.

Jaalle Maxamed Aadan waxa kale oo uu sheegay in halganka soo taxnaa muddada dheer ee dadka Madax bannaanidooda u dagaallamaya maanta gaaray heer aad u sarreeya ay Xabashidu mas'uul ka tahay dhibaatada halkaasi taalla ka dib markii ay ka dhega adaygtay in dadkaasi loo oggolaado xuquuqda ay u leeyihiin aaya ka talintooda.

«Waxa kale oo ayaan darro ah inay Xabashidu shirkii Magaalada Libreville ee Arrimaha Di-Wasiirrada bedda ee guddigii Niyadsamida Siddedda dal ahaa oo loo xilsaaray Arrinta Geeska Arfika dhex keeneen godobbo ay ku doodayeen in Soomaaliya iyo Xabashidu ay isku hayaan arrimo soohdimeed halkii ay ka keeni lahaayeen shirka in arrinta dhabta ah oo ah gumeysiga iyo dadka Soo. maalida Galbeed ee uu gu. meysanayo lagaga doodi lahaa» ayuu sheegay Jaalle Maxamed Aadan Sheekh.

Guddoomiyaha oo hadalkiisii sii wata wuxuu kaloo sheegay in shirkii Madaxweynayaasha doodo dheer ka dib, la gartay culayska dhibaatada Geeska Afrika, gaar ahaan arrinta Soomaalida Galbeed, weerarrada bareerka ah ee Xabashida in Madaxdu ay go'aan ku gaareen in Ciidammada Soomaaliyeed iyo Xabashida ay xudduud-ku-sheegga dib u uga gurtaan qiyaas dhan 5 Kiilomitir, dhibaatada halkaasi ka socotana la joojiyo iyo in Guddigii siddeedii dal ee loo xilsaaray arrintaas ay sii wadaan baaritaankoodii, si loo gaaro xal caadil ah.

Isagoo ka hadlaayey xaaladda Ereteriya wuxuu hadalkiisii ku xusay inay ayaan darro tahay inaan marnaba lagu darin ajendaha Madaxweynayaasha xaalkaasi iyadoo dagaalladii ugu kululaa ay ka socdaan maanta meel aan ka fogayn shirka Madaxweynayaasha, wuxuuna intaasi raaciyey in in xaqiiqdu ay tahay in xaalkaasi ay Afrika mar arki doonto.

Wargeyska Heegan

Tirsigii ugu horreeyey ee wargeys todobaad la ah oo ay soo saarto Wasaaradda warfaafinta iyo hannuuninta Ummaddu ayaa bishii july 17dii soo baxay.

Soo saaridda wargeysku waxay la xidhiidha qorshaha iyo dadaalka loogu jiro in horey loo mariyo saxaafadda Soomaaliyeed.

Waa wargeys toos u qaada dhigaya arrimaha dhaqaalaha, dhaqanka iyo siyaasadda ee Ummadda Soomaaliyeed iyo guud ahaan qaybo kale ee xiisa leh.

Heegan wuxu ka dhashay baahida maalinba maalinta ka dambeysa sii kordheysay ee loo qabay wargeys todobaad la ah oo Af Ingiriisi ah.

Ka dib markii culeys iyo awood la isugu geeyey hirgelinta qorshadaas iyo kuwa la mid ahba oo go'aanno lagu gaadhay hay'adaha sare ee maamulka dalka si loo hagaajiyo wax-kuool ka qaabka warfidnita Soomaaliyeed.

Tusmada wargeyska waxaa ka mid ah wararka gudaha iyo dibada ee todobaadka, ee wuxuuna muuqaal cad ka bixinayaa xaqiiqadda xaladda Geeska Afrika

Eedayn aan sal lahayn

Kulankii UMA ee bishii Luulliyo 13dii Soomaaliya waxay kaga jawaabtey eedeyn sal lahayn oo ay ku andacooneysey Itoobiya, eedeyntaas oo sheegaysey in Soomaaliya ku xadgudubtey dhul ay leedahay xabashidu. Jaalle Xuseen Cabdulqaadir Qaasim, Wasiirka Macdanta iyo Biyaha, kana mid ahaa wafdigii madaxweynaha JDS, Jaalle Siyaad, wuxuu si caddaan ah uga jawaabey eedayn uu wafdiga Xabashidu shirkaa uga soo jeediyey dalka JDS.

Wasiirka oo ka jawaabey wafdiga Xabashida oo Soo. maaliya ku eedeeyey in JDS ku xadgudubtay dhulka Xabashidu, wuxuu sheegay inaysan JDS haba yaraatee ku xadgudbin dhul ay leedahay Xabashidu; hase yeeshee taliska Addis Aba

ba uu kula soo galgalanayo JDS dagaalka ka dhexeeya iyaga iyo gobannimadoonka. Jaalle Xuseen wuxu shirka u soo jeediyey bal in la isweydiiyo cidda mas'uul ka ah halganka ay wadaan gobannimadoonka Ereteriya, Tigre, Abbo, Canfar iyo ururada kale ee EDU, EPRP iyo dhammaan qawmiyadaha kale ee ka gilgilanaya in ay ka hoos baxaan cadaadiska iyo gumeysiga taliska xabashida.

Wasiirka Macdanta iyo Biyaha Jaalle Xuseen Cabdulqaadir Qaasim, wuxu shirka u sheegay in taliska Addis Ababa si uu ugu beddelo arrinta Geeska Afrika mid dhex taalla Soomaaliya iyo Xabashida, wuxuu markasta ku soo xadgudbaa qarannimada JDS, iyadoo dayuuradahiisa dagaalka ay

duqeeyaan Tuulooyin iyo Magaala Oo yin ka tirsan JDS, kuwaas ay ka mid tahay magaala Madaxda Labaad ee Soomaaliya, Hargeysa, weerarkii ugu dambeeyeyna ay ciidammada cirka ee Xabashida ku soo qaadeen tuulada Cabdulqaadir 13kii Luuliyo, oo ka tirsan Gobolka Waqooyi Galbeed.

Jaalle Xuseen wuxu ku nuuxnuuxsaday in dabeecada xaaladda ka aloosan Geeska Afrika ay tahay mid ka dhexeysa talis gumeyste ah ivo dadyow la gumeysto, wuxuuna intaa ku daray in aaney Soomaalida Galbeed oo keli ah ahayn dadyowga u halgamaya madaxbannaa. nida iyo in ay iska tuuraan heeryada gumeysiga Xabashida, hase yeeshee ay halgankaasi ku jiraan dadka Ereteriya, Tigre, Cafar iyo Abbo.

Wasiirka oo ka jawaabavev wafdiga Xabashida oo Soomaaliya ku eedeeyey in ay dibedda ugu yeeratay quwado shisheeye ah, wuxuu sheegay in ay tahay wax la yaab leh in Xabashida oo Ciidamo shisheeye ah uga yeeratay inta u dhexaysa Karebiyaanka (Ameerikada Dhexe) iyo Yurubta Bari (Ruushka), noqotayna hoygii uurkiraalayaasha ay ku eedeyso Soomaaliya Ciidamo ay dibedda ka keensatay.

Jaalle Xuseen, wuxuu shirka u sheegay in gobolka Soomaali Galbeed ee Xabashidu gumeysafo ay maanta joogaan Ciidammo Kuubaan ah oo ay tiradoodu gaareyso 17ilaa 27 Kun oo si aadaminimada ka fog u gumaadaya dadka maatada ah ee ku nool Soomaalida Galbeed.

Bay oo gudoonsatay Billad

Madaxweyne ku-xigeen-ka J.D.S. Jaalle S/Guuto Ismaaciil Cali Abokor, oo ay la socdeen Guddoomiyayaa-sha Hoggaammada Maali-yadda iyo Abaabulka Jaalle G/Sare Cismaan Maxamed Jeelle iyo Jaalle G/Sare Cabdulqaadir Xaaji Maxamed ayaa booqosho maalin ah ku tagay 18-19kii bishii Julay Magala Madaxda Gobolka Bay ee Baydhabo.

Jaalle Ismaaciil intii ay joogeen Baydhabo wuxuu ku guddoonsiiyey golaha ciyaaraha ee Baydhabo, gobolka Bay billad maar ah ee Kacaannimo, Jaalle Ismaaciil waxaa kale oo isla munaasabaddaasi uu ku guddoonsiiyey billad maar ah ee kacaannimo, shahada sharafta kowaad ee kacaanimo, sare u qaadid darajo, shaqo siin iyo abaalgud dhaqaale lix lix qof oo ka tirsan gobolkaa una badnaa dadweyne oo ku muteystay kaalintii weyned ee ay ka qaateen soo qabqabashadii dadkii ka qayb qaatay inqilaabkii dib-u-socodka ahaa ee 9kii Abriil 1978kii.

Madaxweyne ku-xigeenka JDS Jaalle Ismaaciil Cali
Abokor oo munaasabaddaasi hadal ka jeediyey wuxuu
ammaan ballaaran u jeediyey guud ahaan dadweynaha ku dhaqan gobolka Bay
iyo gaar ahaan dadkaasi
abaalgudyada muteystay
qaybtii wacneyd ee ay ka
qaateen daafacaadda kacaanka, midnimada Ummadda iyo ka hortagga dib-usocodka iyo kacaan diidka.


Madaxweyne ku-xigeenka wuxuu sheegay in kacaanku ka abaalmarinayo qof allaala qofkii gacan ka geysta midnimada Ummadda iyo ilaalinta qarannimadeeda, wuxuuna ku guubaabiyey Ummadda Soomaaliyeed inay u feejignaadaan danahooda iyo horumarka dalkooda.

Dugsi Cusub ee Farsamo



Xalad lagu wareejinayo xilka dugsi cusub ee Farsamo iyo bixitaankii farsamoyaqaanno reer Kuuriya ah oo dhismaha dugsiga hirgeliyey, ayaa lagu qabtay xarunta Wasaaradda Waxbarashada bishii Luuliyo 23dii.

Munaasabaddaasi waxaa



ka soo qayb galay Wasiirka Waxbarashada Jaalle Aadan Maxamed Cali, Safiirka Kuuriya u fadhiya Muqdisho Jaalle Han Bong Chol iyo saraakiil Soomaali iyo Kuuriyaba ah.

Hadal uu ka jeediyey xafladdaasi Wasiirku wuxuu ku xusay ahmiyadda uu u leeyahay dugsigu mustaqbalka farsamada iyo horumarka dalka iyo dadkaba, waxaanu yidhi dadka iyo dowladda Soomaaliyeed waxa ay mahad weyn u celinayaan dawladda Kuuriya kaalmada ay ka geysatay hirgelinta mashruuca dugsigaasi.

Wuxuuna intaa raaciyey inay wax weyn ku kordhineyso xidhiidhka saaxiibtinnimo iyo iskaashiga ee sii xoogoobaya kana dhexeeya labada dal

Jaalle Aadan wuxuu u mahadnaqay dawladda iyo dadka Kuuriya ee uu hoggaaminayo Jaalle Kim Il Sung iyo gaar ahaan kooxdii farsamada ee gacanta weyn ka geysatay dhismaha dugsiga cusub.

Wasiirku wuxuu guddoonsiiyey shahado sharaf labada kooxood ee farsamayaqaan ee Kuuriya iyo Soomaaliya.

Safiirka Kuuriya Comrade Han Bong Chol oo isna khudbad ka jeediyey munaasabaddaasi waxuu ka hadlay xidhiidhka soo koraya ee iskaashiga iyo saaxiibtinimo ee labada dal.

Wuxuuna inta ku daray in dhismaha dugsigu uu tusaale cad u yahay iskaashiga maalinba maalinta ka dambeysa sii kordhaya ee ka dhexeeya labada dad ee ay hoggaanka u hayaan Jaalle Maxamed Siyaad Barre iyo Comrade Kim II Sung.

Safiirku wuxuu sheegay in Ummadda Kuuriya ay aad ula dhaceen horumarka ay gaadhay Ummadda Soomaaliyeed dhinaca halganka ay ugu jiraan Midnimada Ummadda iyo horumarinta dhaqaale.

Comrade Han Bong Chol wuxu xusay halganka ay ugu jiraan dadka Kuuriya dhismaha dalkooda, hirgelinta habka hantiwadaagga iyo la dagaallanka imberyaaliyadda.

Dugsiga cusub ee farsamadda waxa si rasmi ah u furay bishii July 1dii Madaxweynaha JDS Jaalle Siyaad. Dugsigu wuxu qaadaa 2000, oo Arday.

Go'aanadii UMA iyo Shirkii Dhexdhexaadka

Baahida ah in UMA uu ambaqaado straatejiya keli ah ka hor shirkii dawladaha dhexdhexaadka ah ee Belgrade, waxa ku nuuxnuuxsaday Wasiirka Arrimaha Dibedda ee JDS Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre intii ay socotay dooddii dhexdhexaadnimo ee Golaha Wasiirrada dibedda ee UMA Magaalada Khartuum.

Wuxu soo jeediyey in UMA xil ka saaran yahay sugidda madaxbannaanida waddammada ku jira ururka dhexdhexaadka ah, waxaanu sheegay in waddammada qaar aaney u qalmin in ay ka mid ahaadaan dhaqdhaqaaqa dhexdhexaadnimada, loona baahan yahay in laga takooro.

Waa nasiib darro ayuu

yidhi in waddammo ka mid ah Ururka inay u xuubsiibteen adeegeyaasha quwadaha waaweyn, wuxuuna gaar ahaan tusaale ugu soo qaatey, Jasiiradda Kuubba, taasoo uu yidhi; waxay u xeydatay u adeegidda iyo daryeelka danaha dawladaha xoogga weyn, sidaas darteedna ay ku xadgudubtey xeerka iyo mabda'a ah udub

dhexaadka Ururka Dawladaha Dhexdhexaadka ah; «Xarakada Kuubba waxay u soo jiiday ceeb iyo meel ka dhac Ururka» waxaan aammin sanahay in Waddammada qaar aanay u qalmin in ay ku sii jiraan ururka», ayuu ka digey.

Bishii Juunyo 28dii Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre wuxuu khudbad ka jeediyey shirkii Wasiirrada Dawladaha dhexdhexaadka ah ee Belgrade

Wuxuu Wasiirku ku xusay kaalinta muhimka ah ee uu Ururku ka qaatey arrimaha adduunka; dadaalka uu ka geystay isku dheelli tirka xiisadda Galbeedka iyo Bariga, iyo ku dhaqaaqidda tallaabooyin uu horseeda dhimista hubka halista ah iyo hab cusub oo dhaqaale iyo gaar ahaan wax ka qabadka degdegga ah ee meelaha qaar, sida xiisadda Bariga Dhexe.

Jaalle Cabdiraxmaan wuxu ku nuuxnuuxsaday dhaq dhaqaaqa dhexdhexaadka ahi in uu ahmiyad weyn siiyey uuna guulo waaweyn ka soo hooyey halganka lidka ku ah gumeysiga, Midabtakoorka, sahyuuniyadda islaweynida.

Wasiirku wuxuu tilmaan ka bixiyey khatarta ku soo fool leh faragelinta Ciidammada Shisheeyaha ee Afrika gaar ahaan Ruushka iyo dabadhilifkiisa Kuubba.

Qodobbadii uu soo bandhigay ee shirku ka dooday waxaa ka mid ahaa; fiiro gaar ah iyo baadhis lagu sameeyo waddan kasta oo si badheedh ah ugu xadgudba tastuurka dhexdhexaadninimo iyo ku dhaqaaqidda tallaabooyinka uu muteystey dalkaasi Ururku in uu

si dhab ah u qaabilo uguna dhaqmo qodobbadiisa asaasiga ah, afkaarta iyo ujeeddooyinka ku xeeran iyo himiloolinka Ummadaha ururka dhexdhexaadka ah: cambaareynta faragelinta shisheeyaha weji kasta ha lahaatee; in ay si dakhsa ah uga baxaan Ciidammada shisheeve Qaaradda Afrika; inay iska jiraan, isku duubnina uga hortagaan Dawladaha dhexdhexaadka Gaashaandhigga Mileteriga ee Dawladaha waaweyn

Jaalle Cabdiraxmaan Jaamac Barre wuxu shirka Dawladaha dhexdhexaadka ah ee lagu qabtay magaalada Belgrade ee Dalka Yuguslaaviya, ku soo qaadey in ay ka mid ahaayeen go'aankii UMA, ee Khartuum; inay Afrika wadajir u adkeyso dhaqdhaqaaqa fahexdhexaadnimo; iyo go'aan lid ku ah faragelinta Ciidammada Shisheeyaha.

Wafdiga Soomaaliya Shirka uga qayb galay iyo wufuud kaleba waxa ay weydiisteen in Shirka Sannadka foodda inagu soo haya ee Dalalka Dhexdhexaadka ah oo horay loogu tala jiray in Havana lagu qabto in meel kale lagu qabto ama dib loo dhigo.

Shirka 15aad ee UMA wuxu gaadhay go'aan muhimah ka dib markii ay albaabada u xireen kulankoodii shanta maalmood, ee ku dhammaaday magaalada Khartuum 22kii Bishii Luulyo.

Guddoomiyihii Shirka, Madaxweyne Numeyri wu xu ku hambalyeeyey guusha lagu gaadhay kulankaasi. Wasiirka Arrimaha Dibedda ee Togo waxa loo doortay Xoghayaha Guud ee U.M.A.

(Eeg Bogga 26aad)

Agaasimaha Ururka Islaamka oo yimid Soomaaliya

Mr. Ibraahim. O. Ismaaciil, Agaasimaha waaxda Miisaaniyada ee Ururka Islaamka ayaa booqasho ku yimid Jamhuuriyadda Dimoqraadiga ah ee Soomaaliya 20kii ilaa 27kii bishii Luuliyo.

Mar uu wariyayaal uga warramaayey ujeeddada booqashadiisa, wuxuu sheegay in booqashadiisu la xidhiidho sii xoojinta xiriirka ka dhexeeya JDS iyo Ururka Islaamka ee dhinaca Iskaashiga. Wuxuu kaloo shaaca ka qaadey in Ururka Islaamku ku kaalmeyn doono 700,000 oo Doollar lacag dhan, xarumaha dhallinta kacaanka iyo xeryaha dadka ka soo qaxay cadaa-

diska gumeysiga Itoobiya.

Intii uu booqashada lu joogey dalka Soomaaliya Mr. Ismaaciil wuxu la kulmay Madax Soomaaliyeed, wuxaanu soo booqdey Xarumaha Dhallinta Kacaanka ee Afgooye iyo Lafoole iyo Xeryaha Qaxootiga ee Hargeysa.

Agaasimaha Ururka Islaamku isagoo u warramayey Jaraa'idka ka hor intaanu ka ambabixin dalka wuxu sheegey in uu warbixin ku saabsan xaaladda qaxootiga Soomaali Galbeed iyo waaya-aragnnimada uu ka korodhsadey Soomaaliya, u gudbin doono Ururka Islaamka Xarruntiisa ku taala Jidda.




QAAYAHA XOOLAHA IYO DAREENKA QOFKA SOOMAALIGA AH

RASHIID SH. CABDULLAAHI

Xoolaha nooli, ugu horreyn geela kaddibna ariga, lo'da iyo ilaa xad farduhu, qaayo aad u weyn bay qofka Soomaaliyeed weligii la hahaayeen. Maanta oo aan bulshadu ahayn tii dunida kale ka go'nayd, ee qoyska raacatada ahi xoolahii. sa iyo degaanka foofkooda aannu wax shisheeya maanta oo nolosha reer magaalnimo korortay, la socodka dunida debedda iyo waxyaalaha ka dhacayaana heerkii ho re mid ka sarreeya joogta, ta ugu muhiimsan, maanta oo tacab dhalin jaad kale ah, baxaaddeedu haba yaraatee, nolosha ku soo biirtay, haddana sidii baa dhaqashada xoolahu u tahay qiime kasha ama qalbiga qofka Soomaaliyeed ku weyn.

Sida runta tahay, sida qofka Soomaaliga ahi u qaayo siiyo xoolaha nool siiba geela, mararka gaarkood, marka aad dhugato, waxaad mooddaa tu maangal kasta dhaafsan. Haddii ay suurogal inoo ahaan lahayd halkan in aynu shax ku muujinno qiimeynta bulshani. mo ee Soomaalidu leedahay bulsho ahaan iyo xoogga qiimad kastaa dareenka iyo damiirka dadka ku leedahay inna shaki igagana jiro in qiimaha xooluhu kaalinta koowaad iman lahavd. Meel kaleba haddii aynaan ka doonin; haddii aynu dhinac uga leexanno raa catada Soomaaliyeed oo lagu qiyaaso in ka badan boqolkiiba toddobaatan inay dadka Soo. maaliyeed uga dhigmaan oo aynu isku koobno reer magaa Ika waxaynu arkaynaa sida



xoogga leh ee qaayaha xooluhu sekoloojiyadooda ugu weyn tahay. Waa wax caadi ah in aad aragto dad reer magaal ah, oo xiriir miyi, gaar ahaan mid raacato oo ay leeyihiin ivo xoolo nool oo miyi ka jiraa toona aanay jirin, xirfad ahaanna raacato kaba fog, qaar. koodna indheergarato jaama. cado ka soo baxay yihiin, oo haddana isha ay xoolaha ku eegaan aanu waxba ka duwaneyn isha ninka raacatada ah ee xirfad, dhaqan iyo dareen ahaanba ka sokow, asagu halkaas ku dhex nool

Ugama socdo hadalkaas in aan dhaqashada xoolaha nool qiima dhimo ee waxay ujeed dadu tahay in aynu xaalad jir. ta oo mowduuci ah sideeda u dhigno isla markaa barbar dhigno xaalada kale; waa marka aynu isu fiirino sekoolooji. yada qofka raacatada ah iyo qofka bulshada casrigan ah ku nool ee laga yaabo in qiimad da cilmiga iyo farsamada teknoojiyada cusub, kuna dabbaqan wershadaha, beeraha xoo. laha iyo dhinaca kasta oo nolosha bulshada ahi la weyn ta. hay. Bulshadan oo kale qiimadda laga yaabo in ay wax kasta ka kor marto waa lacagta oo ah tiirka nolosha qofku isku taagto.

Xaaladda mowduuciga ah ee ina hortaal waa bulsho ka soo guuraysa hab bidaa'i ku dhow oo ka soo baxaysa hab raactanimo oo qaabkiisu yahay guur-guur iyo geeddi, hab kala beddebadeecad la shaa ku yarayd sidaas darteed isticmaalka lacagtu waqti aan fogeyn ka hor ku yaraa amaba aan la agoon. Mar haddii heerkaas xirfada ama meheradda asaasiga ee dadka badankiisu ku dhaqnaa ahayd xoolo dhagasho, taas oo degaanka dabee caddu qasabtay, waa wax la garan karo in qiimaha ugu weyn ee aad mooddo inay qii. me kasta oo kale qorqoortay ama haddii kale, si uun u saamaysay noqoto xoolaha nool, ayna run ahaan xag kasta ka raadayso maskaxda; qofka iyo dareenkiisa.

Way suurowdaa in dadka qaarkii dhaqankii raacatinnimo wax beri jirey u qabaan ayaga oo dhaqdhaqaaqa nolol maalmeedka magaalada oo keli ahi u muugato. Wax aa s e run laga murmin ah in aynu bulsho raacato ah weli nahay. Ka sokow dadkeenna oo raacato u badan inteenna yar ee reer magaalka ah xididdo maaddiya iyo kuwo sekoolooji ah baa habkaasi ku leeyahay. Dareenka qofka Soomaaliyeed iyo garaad bulshannimo gaar ahaan, mar kasta waxaa ku dheehan qiimaha habkaas. Waxaynu taas ka arkeynaa badi caadooyinka nolosha ee ku saabsan waxaa la xurmeeyo iyo waxaa la naco? Maah. maahaha iyo ereyada iyo weeraha carabka dadku ku dhaco ee lagu fekrad adkeysto, sida dadku wanaagga iyo xumaha u kala saaro, waxa guruxda loo yaqaan iyo waxa fool xumada loo yaqaan iwm;

QIIMAHA XOOLAHA IYO SUUGAANTA DADWEYNAHA (FOLKLORKA)

Bulshada Soomaaliyeed tijaabada taariikheed ay soo martay waxay ku cab

birtay suugaanta dadweynaha Soomaaliyeed. Suugaan-Dadweynaha Soomaaliveed waa badweyn buuxda mowjadaha iyo 00 dhumucda biyaheeda guuxava ma ahee inta nolol iyo jiraa kale ku jira oo kale leh. Waxa dheer quruxda fannimo ee suugaantaas ku dahaadhan oo aanan waxaan u dhi go garaneyn. Waa qurux gaar ah, goonideeda ah oo dhadhan aan lala wadaagin leh. Waxay ka soo fudtay waaya nololeed oo keli meel isu taag tay, taariikh bulsheed jid gooni ah leh iyo dareen sekoloo. jiyeed oo ka dhashay bulshadaas.

Tajrubada bulshannimo ee ilaa xadkaas gaarka ah baa qiimaha xoolaha nooli xudun u tahay. Qiimahaasi waxa u sal ah dabeecada qalafsan ee dhulka oo xirfadda asaasiga ah ka dhigtay xoolaha dhaqashada, waxayna taasi saameysey dareenka dadka Dareenkaasi markii uu biiraha suugaan qurux badan buu butaacayey.

Haddii aynu geela gooni ula baxno waxaynu arkaynaa xaalad gaar ah oo ina tusaysa sida geelu bulshada Soomaaliyeed ku yahay. Wuxuu geelu Soomaalida u ahaa walina in badan u yahay lafdhabarka nolosha. Bulsho dambaysa oo dhul qarfo ah ku nool geelu hubka ugu roon ee loo ciirsan karo ayuu ahaa; gar bayna ahayd in la yiraahdo:

Naasahaagaan Nafaqaad iyo Naf wax celiyeyo Noollo ku ogaa.

Halkaas baa geelu ka joogay dadka; run bayna ka ahayd oo geelu waa meersiga ugu anfac badnaa markii magaalo iyo ganacsi aan la aqoon ee aan lacagtu jirin, adhiguna aanu tacab lacageed oo

weyn gelin, sida aynu hadda aragno. Hase yeeshee waagaasba ari iyo lo'ba waa la dhaqan jirey, waana lagu intifaaci jirey; marse haddii waxa xoolo loo dhaqdaa waagaas ahaa cad iyo caano waxaa xoolaha loo kala jeclaa adkaysigooda. Geela abaaraha iyo haraadka u adkaysan jiray.

Marka kale waa ka yidhi ninkii geel dhaqashadii jirrabay:

Geeridaadana Gaawe madhiniyo Gaajo laga qaad Geeridaydana Guryo ba'ayiyo Gablan laga qaad.

Geel jacaylku Soomaalida darteed degaankaas sidaas qarfada ah iyo dibu dhaca keeney, taas ayaana avaa geela ka dhigtey hubka koowaad ee nolosha loo cuskado. Hase yeeshee qaaya siinta geelu, geesta aynu bulshada ka fiirinnaba way ku tallaalan tahay. Geelu wuxuu ahaa maalka lagu xil baxo ee la isku maamuuso, ka dabka dagaalka ooga iyo ka nabadda soo celiya ee beelo heshiisaya oo diyo iyo qaan geel baa loo bixin jirey. Waxaa kale oo geelu ahaa ka qofka magaca iyo haybada siiya.

Geela waa lagu xididi jirey, yaradka asaga ayaa geli jirey. Qaayaha wada xididka waxaa lagu qiyaasi jirey tirada geela ee la kala qaato. Sharafta gabdhuhuna waxay ahavd tirada geel ah ee rada looga bixiyo. Ma ahayn yaradka oo keli ah ee meherkana geel baa lagu giimeyn jirey. Geelu cidda leh haybad buu siin jirey. geel badan oo hantidiisa raadka bulshannimo guud lagu yaqaan magac fiican buu lahaan jirey. Way jirtaa bulshadaa dib-u-dhaca ahayd kala sarrayn dabagadeed oo dadka qaarkii jago sare iyo awood gaar ah u yee.

shaa ma jirin badanaa, mana jirin dhismo dawladeed oo maamul guud leh sidaana dadka qaarkood jagooyin kala sarreeya iyo awood talis u siiya. Waxaa keli ah oo jirey haybad iyo magac qofku ku kasbado inta xoola ah, siiba geel ah ee u foofta. Waxa kaabi jirtey taas oo si ugu xirneyd baaxadda qoyska ee ninkaasi u hogarka ahaa, waayo waxaa kale oo laga haybad heli jirey

tirada wiil ee ninka ka farcanta (kuwa uu dhalo iyo kuwa wiilashiisu dhalaan) arrintan lafteedu kama go'na lahaanshaha geel badan. Nin geel badan leh baa ilaa afar dumar ah guursan karay, waayo yarad weyn buu bixin karay, taabboqaadka wiilashiisana wuu u guurin karay, waxaana uu dhisan karay qoys ballaadhan oo magac iyo maamuus u soo jiida.

Bulshada Soomaaliyeed oo qabiilooyin, siyaaso ahaan, kala wada madaxbannaan ahayd waxaa ka dhex dhici jirey dagaallo iyo loollan, sababta keentana geela ayaan u badnaa; waxayna taasi aad uga muuqataa suugaanta Soomaaliyeed ee dagaalka ku saabsan. Mowduucaas mar kale ayeynu isla eegi doonnaa.



QORAAYOW YAAD LA JIRTAA?

teed qoraal kasta waa mid ka hadla waayaha iyo xaaladaha nololeed ee lagu siman yahay.

Haddaba si aynnu ugu daadegno dulucda iyo ujeeddooyin.

Kadarb curashadii Kacaan. ka 21ka Oktoobar 1969kii gaar ahaan qoristii Far Soomaaliga ivo guud ahaan guulihii laga gaaray soo nooleynta ivo horomarinta dhaqanka waddaniga ah ee Soomaaliyeed; waxaa in dadweynaha caddaatav Soomaaliyeed, ay ku dhiiradeen wax qorista; taasoo tilmaan u ah heerka horumarka leh ee korriinka dhaqanka, bisdadka laanshaha garaadka iyo xiisaha ay u hayaan wax qorista iyo hor u dhigidda dhaqanka Soomaaliyeed.

Wax qoristu waxay leedahay muhimada ballaaran, oo suura gal ka dhigeysa in ay bulshadu markasta ku micneyso taariikh — bulshadeedxiriirkeeda ka saameynaya dhaqaale, siyaaso, dhaqan iyo anshax. Waana dhigaalka ugu qiimo badan iyo hannaanka ugu fudud ee wax la isugu tabiyo Korriimada iyo horumarka laga gaaray wax qoristu ma aha arrin si sahlan ku timid; waxayse la soo tallaabo-qaadday xiriir nololeedka bulshadeed ee ku jira isbeddelka iyo horumarka joogtada ah; lehan duruufo iyo waayo nololeed oo xaddidan. Sidaas dar-

Haddaba si aynnu ugu daadegno dulucda iyo ujeeddooyin. ka Qoraalka; bal aynnu is weydinno su'aalaha ah waa maxav xiriirka ka dhexeeya qo. raalka iyo Bulshada? Waana maxay dabeecadda qoraagu leeyahay? Su'aalahani inkasta oo ay muddo dheer soo taxnaayeen; haddana waxay qiimo gooniya yeesheen casrigan aynnu ku noolahay, oo ay Bulshada adduunka u kala leexatay waddooyin ho. rumarineed oo kala leh jaho siyaasadeed, xiriir dhaqaale iyo dhaqan. Sidaas darteed way adag yihiin in si fudud looga jawaabo; waxayna u baahan yihiin dersid ballaaran iyo aragtiyeed oo qoto saldhig dheer, oo loo yeesho sifaha iyo dabeecadda xiriirka nololeed ee bulshada adduunka iyo gaar ahaan dhismaha iyo xaalada. ha bulshadeed ee dalka markaas laga hadlayo. Dulucdeeduna waa mid ku xiran garashada loo leeyahay qawaaniinta guud ee xukunta horumarka xiriirka nololeed ee bulshada. Maxaa yeelay fahamka Cabbi Yuusuf Riyaale

aragtiyeed ee kala duwan ee laga qabo xaaladda nololeed ee bulshada waxay keeneysaa jawaabo kala duwan in laga bixiyo su'aafahaas iyaga ah.

Dad badan oo leh aqoonyahanno iyo xeeldheerayaal ayaa marka la soo qaado su'hadlayadaaasha ka beecadda uu leeyahay xiriirka ka dhexeeya Qoraalka iyo Bulshadu waxay qabaan in qoraalku yahay wax dhexdhe. xaad ah, oo aan lagu difaacin xiriir nololeed oo mucayan ah; hase yeeshee u arka xaaladaha nololeed si siman. Sidoo kale qoraaguna waa qof aan isugu cidna danaheeda ka tarjumin, balse markasta wuxuu ula niyooda oo kaliya inuu dadka u soo bandhigo oo gaarsiiyo dareenka uu ka qabo ifafaalooyinka nolosha. Taasoo gofna jeclasan karo, qofna necbaan karo.

Dulucda iyo nuxurka ka muuqata fikraddani waxay tahay; sifaha qoraalka oo ay u arkaan si qof ahaaneed iyo ayagoo fogeynaya dabeecadda dabaqiga ee uu qoraalku leeyahay; kuna xiran xaaladda nololeed ee jirta.

Tusaale gaaban, haddii aan soo qaadanno, waxaa jira qo raallo ka hadlava arrimaha siyaasadda dhaqaalaha Bulshada ku saabsan. Qoraaladaasu marka ay ka hadla. vaan arrimahaas waxay soo gaadaan oo kaliya dhibaatoovika ka jira: gaar ahaan marka ay ka hadlayaan, waddammada soo koraya, waxay tilmaamaan dib u dhaca dhaqaale, ivo dhagan ee haysta. Hase veeshee kama hadlaan sababaha saldhigga u ah dhibaatooyinkaas iyo xaaladaha qas baya ee hortaagan ka bixidda dhibaatooyinkaas Kuwooda ugu roon ee ka xishooda inay ku ekaadaan oo kaliya tilmaa. midda dhibaatooyinka haysta waddamada soo koraya, aqoonna isbida waxay sababaha saldhigga u ah dib-u-dhacaas ku sheegaan inuu vahay agoon darrida iyo xirfad la'aanta mase suurta gasho in ho rumarka laga gaaray sayniska iyo teknoloojiyada ay xalliyaan dhibaatooyinka asaasiga ah ee haysata waddammada ho rumaray qaarkood waxayna ku eedeeyaan dadyowga waddammadaas oo ay ku tilmaa. maan inaysan u jajabnayn, una hagar bixin tacbashada. Waxayna ku taliyaan in dib-u. dhacaas lagaga bixi karo oo iyadoo kor loo qaado oura. agoonta, lana helo agoonyahanno. Fikraddanu ma xuma, oc way habboon tahay in agoonta hore ay u mariyaan, balse aqoontu ma xallin kartaa arrimaha asaasiga u ah dibu-dha ca bulsooyinkaas? Jawaabtu Sida xaqiiqda ah, waayo-aragnimada horumarka taariikheedna muujisay in saldhigga dib u dhaca dhaqaale iyo dha. gan ee waddammada soo koraya tahay mid ka dhalatay dhaca, hagardaamada, iyo cadaadiska gumeysiga; taasoo weli uu gumeysiga cusubi ku hawlan yahay sii waarinteeda Sidaas darteed xalka asaasiga ah ee ka bixidda dhibaatada

waxay ku xiran tahay beddelitaanka xiriirka nololeed iyo dhismaha bulshada; oo ah tirtiridda jidka laga dhaxlay gumeysiga iyo ku tallaabsiga jidka horumarka ee liddiga ku ah gumeysiga, gumeysiga cusub iyo qaab kasta oo isku dulnoolaadku leeyahay; taasoo dulucdeedu tahay Baabi'inta xiriir nololeedka duugga ah iyo dhismaha xiriir nololeed cusub, oo horumarsan.

Haddaba innagoo halkaas kaga hareyna tusaalahaas gaaban, bal aynnu si aragti cilmiya ku fadhida u lafa-gurro su'aalihii ku saabsanaa xiriir ka qoraalka iyo bulshada; iyo sifaha qoraagu leeyahay?

Muran kama taagna in qof. ku ka mid yahay bulshada Bulshaduna waxay leedahay nidaamyo dhaqaale, siyaaso, dhaqan iyo caadooyin. Nidaamyadaasu waa kuwo ka jira xiriir nololeedka bulshadeed ee isbeddelka ivo horumarka joogtada ah ku jirta. Wuxuuna qofku ku khasban yahav inuu u hoggaasanaado nidaamyada bulshada, taasoo ku xi. rnaantiisu noqon karto mid toos ah ama mid dadban; maxaa yeelay — ku xirnaantiisu waa mid isaga ka baxsan. oo xididdo ku leh xiriir nololeed. ka bulshadeed.

Casrigan waa casri ay bulshadaha Adduunku u kala qaybsameen, oo ay kala raa. ceen labo hab oo nololeed oo uu ka dhexeeyo loolan joogto ahi Haddii aynnu ka soo degno aragtidaas guud, oo aynnu u soo degno bulshooyinka ku dhisan dabaqadaha, waxaynu durbadiiba arkeynaa in Bulshadaasi u kala qaybsan tahay dabaqado — ah:- Mid wax ku dulnool iyo mid lagu dulnool yahay, mid wax cadaadisa iyo mid la cadaadiyo; waxaana ka dhex oogan halgan aan innaba waan waan lahayn, oo saamay

nava qaybaha nolosha, oo leh Siyaasadda, Dhaqaalaha, Dhaganka, Aydoloojiyada iwm. Jahada loolankaasu waa mid ah xoojinta iyo sii waarinta isku dulnoolaadka ivo cadaadiska oo dhinaca ah, ayna horseed u tahay dabaqadda maalqabeenka iyo dhinaca kale, oo ah dadweynaha xoogsatada ah, oo u halgamaya iska tuurka heer yada isku duul-noolaadka, iyo dambevnta ivo dhismaha bulsho xor ah oo cusub. Waxaa hubantida taariikhdu caddevsay in ay lama huraan tahay guuleysiga dadweynaha xoogsatada ah

Runnimada arrintani wa. xay ku qotontaa dulucda qawaaniinta xukunta horumarka taariikhda bulshada: waxaana u daliil ah waayo-aragnimada casrigeenna, oo socodka iyo horumarka xaaladda taariikheed ay u xaglineyso dhinaca dadyowga u halgamaya xornimada; dimoqraadiyadda iyo horumarka bulshada, geesta kalena waxa inoo cad. burburka siyaasadeed, iyo qalalaasaha dhaqaale ee haysta dabagadaha maalgabeenka ah: taasoo soo dadajineysa burburka iyo hoobashada xoogagga dibusocodka ah.

Haddaba inagoon ka fogaan dulucda arrinta, gofka bulshadaas kala qaybsan ka tirsan xiriirka uu bulshadaas la leeyahay waa mid caynkee ah? Mase suurta gashaa inuu qofku ka baxsanaado qaybaha ay bulshadu u qaybsan tahay, iyo inuu lahaado fikrad wada raa li gelisa bulshada. Inkasta oo ay su'aalahaani aad u adag yihiin, jawaabo kala duwanaa laga kala bixiyo, taasoo ku xiran aragtiyada kala duwan ee laga qabo horumarka iyo isbedelka bulshada, haddana balaynnu si gaaban uga jawaab-

Doodi kama taagna in qof-

HALGAN

docuto, 1010

ku ka mid yahay Bulshada; balse qofka ka tirsan bulshada dabaqadaha u qaybsan, wuxuu ka sokow ku xirnaantiisa guud ee bulshada si toos ah ugu xiran yahay dabaqadaha ay bulshadu u qaybsan tahay taasoo uu u hoggaansan yahay nidaamka ay dabaqaddiisu leedahay, wuxuuna u hawl galaa ka tarjumidda iyo meel marinta danaha dabaqaddiisa, way dhici kartaa in qofku raaco dabagad aan danihiisa asaasiga ahi ku jirin; hase yeeshee arrintu ma aha in aynu u fii. rinno si gof ahaaneed ee waxaynnu ka dareemeynaa dhinaca ah dan dabagadeed oo wadata ujeeddoovin cad-cad oo guud ahaan saameynaya qaybaha kala duwan ee noloshu leedahay; sidaas darteed avevnu u leennahav, si garasho ah iyo si aan garasho ahavnba wuxuu qofku ku khasban yahay inuu raaco mid uun labadaas dabagadood ay bulshada casrigeennu u kala qaybsan tahay.

Haddaba qoraayoow, maadaama waxa aad qoreysid yi. hiin wax la xiriira xaaladaha nolosha ee bulshada; oo aan laguu soo waxyoon; isla markaasna ay bulshadu u kala qaybsan tahay, danaha dabaqiga ah ee aan hore ku soo xusnay, waa mid aan hore u dhicin, maantana aan dhici karin, weligeedna aan dhicin inta xaaladda nololeed bulshadu tahay mid kala qaybsan oo aan mideysneyn inaad qof ahaan iyo qoraa ahaanba dhexdhexaad noqotid; waxaad gortaana godob kasta oo aad qaaddaaba waa mid la xirriira xaaladaha nololeed ee bulshada kala leh danaha iska soo horjeeda Maxaa yeelay micnaha qoraalku ma aha mid aan ujeeddo lahayn balse sidiisaba qoraalku waa hub waaga bulshada dabaqadaha ku dhisan loo adeegsado daafacaadda, faafinta iyo horumarinta danaha dabaqadeed ee sameynaya

siyaasadda, dhaqaalaha, dha qanka, anshaxa iyo guud ahaan qaybaha kala duwan ee nolosha.

Halkan ugama jeeddo in muhiimadda iyo ujeeddooyin. ka qoraalku uu ku kooban ya. hay oo keliya waaga bulshada dabagadaha ku dhisan, wuxuu qoraalku muhiimad ballaaran leeyahay waaga dhismaha bulshada Hantiwadaagga Taasoo uu qaato nuxur iyo qaab cu sub; wuxuuna cabiraa soona bandhigaa iska horimaadka ka jira dhinaca horumarka Sayniska, iyo teknolojiyada. dhinaca miviga ivo magaalada: shaqada maskaxda iyo tan muruga iwm., oo dhammaantood ah kuwo uu ka maran yahay iska horimaadka cadowtinni. mada ku dhisan, madaama ay

meesha ka baxday qeybsankii bulshada ee ku dhisnaa danaha kala duwan ee iska soo horjeeda

Wuxuu kaloo qoraalku ka hadlaa oo uu sahamiyaa sidii loo xallin lahaa, loona furfuri lahaa iska horimaadka kolba ka dhasha horumarka bulshada cusubi gaarayso.

Haddaba, haddii aan soo ururinno, qoraayoow qalinkaagu waa inuu casrigeenna laba mid uun u adeego; taasoo ah inuu u adeego dadweynaha xoogsatada oo uu difaaco danahooda horena u dhigo ujeeddooyinka iyo himilooyinkooda ama inuu u adeego danaha kooxaha ee maalqabeenka ah ee u haliilaya ku dulnooloodka xoogsatada.



Saadaal Masrax Cusub

- Maxamed Daahir Afrax

Shuushow bax!!... waa bilow farxad leh. Waa Fankeennii oo boorkii iska jafay. Waa masraxa Waddaniga ah oo bisha Luulyo daaha ka fayday daraamihiisii ugu horreeyey. Waxaa lagu magacaabay «TAA-RIIKH LAMA ILLAWAAN». Jilayaashiisu waa hoobollada Waaberi.

Masrax-jecesha waxgaradka ahi in dhoweydba waxay saluugsanaayeen tayada riwaayadaheenna Waxay ka xumaayeen hoos-u-dhaca masraxeenna. Waxay la yaabbanaayeen mu'allifiintaan jacaylka dhalanteedka ah ku waalatay. Waxay tabayeen riwaayadihii dadweynaha ku garabsiin lahaa halganka ay kula jiraan dibudhaca iyo dhaxalka gumeysiga, kuna barbaarin lahaa ka guuridda dhaqammada foosha xun ee turunturraynaaya socodka horumarka bulshada.


Dadka qaarkii waxay u fasirteen dibudhaca Masraxa ka muuqda, in ay tahay arrin ku xiran da'yaraanta fankeenna masraxa iyo guud ahaanba heerka horumarka bulshada. Muran kama taagna in ay arrintaasi lug ku leedahay ifafaalaha dibudhaca Masraxa. Waxaase laga shakiyey in aysan ahayn sababta gura Shakigaasi markii taariikhda masraxeenna dib loo sii raacaba wuu sii weynaanayaa. Waxaa muuqanaysa riwaayaduhu sidii ay u kala horreeyeen in ay u kala qiimo badan yihiin, meeshii laga filaayey in ay u kala qiimo bataan sidii ay u kala dambeeyeen.

Waagii gumeysiga Masraxu

wuu gudan jiray xilkiisii ahaa dagaalgelinta dadweynaha iyo qiimaynta gobannimada. Waagii musuqmaasuqana wuu gudan jiray xilkiisii ahaa qaamaamul xumada iyo winta abuurista ruux kacaannimo oo lagu beddelo. Waajibaadkaas Siyaasiga ah ka sokow, labada waaba masraxu wuxuu gudan jiray waajibkiisa ah la dagaallanka dhaqammada foosha xun ee bulshada ku dhex jira. Qaabka fan ahaaneed ee uu fikradahaas oo dhan u sawirtaana wuxuu ahaa mid aad u hufan oo waqti dheer laga shaqeeyey

Hase yeeshee, waagaan kacaanka ah, masraxleydu way gaabiyeen waajibkoodii ahaa inay masraxa u jeheeyaan sidii maskaxda dadweynaha loogu barbaarin lahaa isbeddel kacaaneedka Siyaasadda cusubi u horseedeyso, loogana dhaqi lahaa haraaga dhaqammadii gaboobay iyo fikradihii ay beereen hababkii dhaqandhaqaale ee jiray waqtiyadii gumeysiga iyo gumeysiga cusub.

Saluugsanaanta masraxee nna aad bay iigu weynayd habeenkii Shanta Luulyo ee aan u daawasha tagay «Taariikh Lama Illaawaan» Ma filayn in aan halkaas kala kulmi doono riwaayad cajabisa.




Waxaan maskaxda ku sii hayey riwaayadihii faraha badnaa ee aan taas ka hor iska daba daawaday, mid walbana ka shallaayey waqtigii daawashadeeda iiga dhumay.

Laakiin, «TAARIIKH LAMA ILLAAWAAN» waan ku mala habaabay. Markii daaha u horreeya laga furay ilaa kan u dambeeya laga xiray waxaan ku dhaygagsanaa bandhig i cajabiyey. Waxay ahayd waji cusub oo masraxeennu la soo baxay. Waji iftiimiya, ku bishaaraynaya mustaqbal fan oo wanaagsan, soo celinaya kalsoonidii awoodda fannaaniinteenna ee shakigu galay.

Mowduuca riwaayaddu masraxeenna kuma cusba; laakiin qaabka ay u farsamaynayso ayaa ku cusub, kana geddisan kii riwaayadihii hore Mowduucu waa guudmar lagu sameynaayey taariikhda Ummadda Soomaaliyeed iyo marxaladihii kala duwanaa ee halgankeeda. Arrintaasna in badan bay masraxleydu taataabteen; inkastoo aan qabo in aan ilaa iyo maanta lagu sawirin shaqo muuqaalkeeda fan ahaaneed ivo bisaylkeeda dhan walba ahi ay u dhan yihiin.

«TAARIIKH LAMA ILLAA-WAAN» waxay ahayd «Darama» aammuusnaan lagu jilaa-yo, waxa ugu weyn ee ay masraxeenna ku soo kordhisayna waa qodobkaas. Muuqaalkeeda fan ahaaneedna wuxuu ahaa heer Sare oo na xusuusinaaya masraxeenii waayo waayo.

Marka daaha u horreeya la qaadaba, waxaa si lama filaan ah u muuqanaysa koox muusikley ah oo saf ballaaran u fadhida, qalabkoodu u dhanyahay, nooto qoran oo ay raacayaanna hortaal, horjoogo hoodii ay ka tilmaan qaadanaayeenna u diyaar yahay. Habkaas qudhiisu waa tallaabo cusub oo ay muusikleydeenu billawday in ay uga dayadaan kuwa dunida. kaddib markii dhowr Laxan oo micne weyn ku fadhiya la garaa.



cay, ayay bilaabanaysaa qisadii Riwaayaddu.

Waa beel barwaaqeysan, dhul ay leedahay deggan, nabad ku dakaynaysa, barwaaqo ku cayaartumanaysa. Marka dambana waa adduun iyo caadadiise laga kala dhantaalayo. Yaa ka kala dhantaalaya! Col baa u soo dhacaya, nabadgelvadii cirka ku shareeraya, barwaaqadiina cagta marinaya. Waa la isu qayla geysanayaa, Colkii baa loo qalab aruursanayaa, dagaal baa lagala hortagayaa Dagaallada hore waa lagu jabayaa Jabkaas waxaa astaan u ah nin shan meelood ka xiranoo saalada geeskeeda shishe ka muuqda.

Halgan kharaar baa bilaabanaya. Labadiisa dhinac waa Ciidankii beesha oo u halgamaaya sidii ninka xiran silsiladaha looga jari lahaa iyo colkii xiray oo ka dagaallamaaya. Dagaalladu way soconayaan, silsiladihii midba mar baa la furayaa. Tii la furaba waa loo faystaynayaa. Marka dambe labaa soo haraysa, dagaalkuna waa soconayaa.

Sheekadu ilaa xad way daboolan tahay, jiliddeeduna way aammusan tahay. Taasina waxay xoojinaysaa dareenka daraamanimo iyo xiisaha la socodka sheekada. Fasiraadda qisada waxaa daawadayaasha la kaalmaynaaya sawirro xagga dambe ka soo baxaya, ee dhacdadii la jilaayaba tilmaamaya taariikhda ay ku beegan tahay.

Ammuuraha cusub ee «TAA-RIIKH LAMA ILLAAWAAN» masraxeenna ku soo kordhisay waxaa ugu muhiimsan:

- 1. Muusikada hordhaca ah ee habka cilmiyaysan loo tumaayo, keligeedna casharka bixinaysa.
- 2. Qaabka aammuska ah loo jilaayo.
- 3. Sida looga faa'ideysanaayo goob kastoo ka mid ah Saalada Masraxa

- 4. Jaangoynta jawiga, ama qaab-abaabuleedka guud ee Riwaayadda oo si weyn loogu guulaystay Taas waxaan uga jeedaa sida ay isu kaashana. vaan, isuna buuxinayaan Muusikada, iftii-Sheekada, minta, diikoorka iyo sawirada xagga dambe ka soo baxaya. Inkastoo aan la oran karin qaybahaasoo dhammi boqol kiiba boqol sidii la doonaayey bay ahaayeen, haddana guul weyn baa laga gaaray.
- 5. Waxaa iyana xusid mudan xagga jilidda oo aad uheer sarreysay. Hoobolladii Waaberi ee riwaayaddaas ka qaybgalay, waxay muujiyeen wacdarihii lagu aqoon jiray fannaaniinta dunida. Waa wax qiimo weyn ku fadhiya xammaasadda dagaalyahannimada ah ee uu muujinaayo ninka matalaaya abbaanduulaha beesha.

Intaas aan soo tilmaamay oo dhammi, waxay daawadayaasha ku beertay xammaasad Waddanninimo iyo macaansi fannimo oo aysan beeri karin riwaayadihii ka hadli jirey jacaylka rigiiska ah; taasina waxay beenisay tuhunkii masraxleydu ka qabeen riwaayad ahayn Caashaq dadweynaha u SOO aysan karin. Sacabkii jiidan kululaa ivo xammaasaddii riwaayaddaas lagu daa wanaayey waxay marag cad u tahay masraxu in uu xukumo dooga dadweynaha, isla markaasna riwaayadiba riwaa yaddii ay ka qiima badan tahay ka shacbiyad badanaayso. Carruurtii lagu barbaariyey riwaayadaha jacaylka iyo khu raafaadka ka warramaaya; kadibna u qaatay masraxaba in uu yahay meel hees iyo qosol aan xikmad ku fadhiyin loo soo doonto; waa laga yaabaa in ay habeennada hore tabaan heesihii iyo hadalladii jacburka ahaa, ee ay u barteen, kuna soo tala galeen; hase yeeshee, aayatiinka iyo

- magaca waaraya, waxaa iska leh, shaqada qiimaha ku fadhida, casharkana lagala haraayo.
- Ammaanta aan riwaayaddaan ku ammaannay arrimaha cusub ee ay ku dhiirratay micnaheedu ma aha in ay «Ceeb-kasaliin» tahay, oo 'aysan meelna dhaliil ku lahayn, maya waxaa jira goldaloolooyin aan waaweynayn, loose baahnaa in la daboolo. Midda ugu weyn haddaan ka soo qabsanno, qaybaha dambe ee riwaayaddu, waxay u ekaayeen wax deg-deg lagu sameeyey oo aan isu dheellitirrayn, una miisaannayn qaybaha hore.

isla Arrinta kale 00 wamiddaas sameyneysa, xav tahay sheekada jiitamaysa ilaa marxalado taariikheed oo fara badan, taasina av khasbayso, in ay sheekaddii guud mar uun noqoto, waana khalad ay had iyo jeer galaan riwaayaddaheenna taa riikhda ku saabsan.

Inkastoo riwaayaddu ahayd mid munaasabad loogu talagalay, haddana fan ahaan, waxav igula gurxoonaan lahayd in av sheekadu ku koobnaato hal marxalad oo ka mid ah marxaladihii halganka Ummdda Soomeeliyeed Haddii shee kada marxalad go'an koobi lahaa, waxaa suurta gal noqon lahayd in marxaladdaas hoos ahaan loogu daadago, lagana soo saaro sawir faneed oo xiisa leh; halkaasna waxaa dhalan kari lahaa ma-«Milo-darama» waaqif muuqaalka loollankuna intaas wuu ka kululaan lahaa xiiso gelinta riwaayadduna way ka badan lahayd.

Masraxa Soomaaliyeed, waxaan ku boogaadinaynaa tallaabadaas aan sheegnay, laakiin yididiilada leh, waxaana u rajaynaynaa in uu tallaabooyin ka waaweyn hore u qaado, kuna guulaysto farriinta taariikhiga ah ee ay ka sugayso Ummadda hayaanka ah.

v. 334

ARAGTIDA CILMIGA AH



Loollanka dabagadeed waa xoogga wadaha horumarka bulshada

Maxamuud C. Cali (BAYR)

Qaybta 1aad

Horumarka bulshadu waa arrin murugsan oo marta taxane dheer oo wejiyo badan Taas ayaa keentay in culimada bulshadu ku dhaqaaqaan inay dejiyaan arrimaha sida lixaadka leh uga qayb qaata horumarka bulshada, Halkaas waxa laga garan karaa in qodobada ugu waaweyn ee saameeya ama keena horumarka mujtamacu ay aad u kala duwan yihiin, una badan yihiin sida taxana taariikheed ee horukaca bulshadu maraa uu u yahay mid daalac-naasil badan. Maqaalkan isaga ah waxaan isku deyi doonnaa inaan ka hadalno sida loollanka bulsha. du uu uga qayb qaato hore u dhigidda bulshada Mawduucan waxa weliba sii siinaya ahmiyad gooni ah xilligan aynu marayno, waxay tahay iyada oo culimada hantigoosadku aad ugu tahanbaabaan inay ceeb iyo dhaleecayn u geystaan loollanka dabaqeed iyagoo ku tilmaamaya inuu loollankaasi maanta yahay mid ka soo horjeeda oo liddi ku ah korriinka caafimaadka qaba ee bulshada. Culimada bulshada ee hantigoosadka oo loollanka bulshadu maankooda qaracan ku ridey waxay hilmaamayaan amase is-hilmaansiinayaan ilbaxnimadii dheerayd iyo agoontii ballaarnayd ee bani'aadamku soo maray taariikh ahaan Sida culimo badan oo burjuwaasi ah, oo K. Popper ka mid (waa caalin Ingiriis ah), qabaan waxay tahay halkii laga sii wadi lahaa halgan dabaqeed oo kolkaasi uu

kaasina keeni lahaa inuu dabiici ahaan si qaab duwan oo qallafsan u dumiyo waxa jira, waxa habboon in xaaladda taagan sideeda loo aqbalo. Xaaladda taagan ee la leeyahay sideeda ha loo qaato waa tan dawladda hantigoosadku si buuxda ugu amar ku taaglaynayso; iyada oo ay weheliyaan shirkadaha qowmiyadaha badan ee hamuuntooda iyo hunguriweynidoodu xad-dhaafka tahay Kuwaas oo si kadeed iyo naxariisdarro lagu yaqaan gumevsiga cusub isku xira amase u sandulleeva dalalka adduunka kale xaruntooda. Isku xirnaantaasi waa tan keenta in dalalka soo korayaa aa. nay marna ka madaxbannaanaan gumeysiga cusub oo ay kula dhaqmayaan dawladaha hantigoosadka ah iyo shirkada. hooda waaweyni. Waxa hubaal ah in ku-xirnaantaasi ay muddo ka dib suuli doonto, iyadoo ay ugu wacan tahay isbeddel ka kulul ee ka socda dalka gudihiisa iyo adduunka dibedda ee hubanti keenaya marxalado isu dabajooga isbeddel wadani ah oo dimuqraadi ah iyo mid hantiwadaag ah oo ku xiga Ivadoo ay runtu sidaas tahay ayaa K. Popper iyo inta la ra'yi wadaagtaa isku taxallujiyaan inay biyo qabow korka kaga shubaan habka hantiwadaagga ah. Waxay aad ugu dadaalaan inay ilaha dadweynaha u furan si looga baxo cuqdadka iyo baahida, silica iyo kadeedka dhagax ka saaraan Waxayse ka tegayaan inuu habka hantiwadaaggu uu yahay kan had walba isasoo hor dhigaya dadyowga adduunka

saddexaad ee u hanqal taa gaya inay habka oodanka ah ee hantigoosadka tiiranyadiisa ka gudbaan. Bal aan yare guda galno arrinta loollanka dabaqadeed iyo kaalinta uu ka qaato soo dedejinta habka hantiwadaagga, samata bixinta dadweynaha iyo gaaritaanka shuuciyada, sareedada, iyo hodonnimada taamka ah.

Culimada taariikhda ee Fransiiska ee casrigii soo noolaynta (Restoration) waxay si dhab ah u sheegeen inuu loollanka dabaqadeed sii socon doono, xoogaysan doono, dhul ballaaran ku baahi doono, keenina doono horukac wada saameeva carrada uu ka shaaco oo idil. Waxa culimadaas ka mid ahaa Francois Guizet. Thierry, Mignet, iwm. Sida Culimadaasi u falaangaysey arrimaha la xiriira loollanka daba qiga ah aad ayey uga duwanayd aragtida kuwii casriga iftiinak Fransiiska (French Enlightenment) ee iyagu qabey in taariikhdu aanay ahayn wax kale oo idil ee ay ku eg tahay sida ay shabaakada mugdiga (aqoondarrada) isaga furfurto. Culimadaasi way ka aragti durugsanaayeen Hegel marka si miyir dhab ah loo dhuuxo ifafaalahooda. Waxaana ugu wacnayd iyadoo Hegel qabay in taariikhdu ku socoto ra'yi mutuxan oo meelna salka ku hayn.

Xilliyadaas hore waxa kaloo dhici jirtey in mararka qaarkood ay culimada burjuwaasiyiinta ee fikrad-abuurku ay ku soo dhici jireen meelo aan runta ku durugsanavn taasoo ay yaalaaba u sabab ahaan jirtey indheer-garadnimadooda; hase yeeshee casrigan dambe aad ayey uga giigeen inay runta oo dhan ku dhawaaqaan. Taas ayaana ka dambeeysey culimadii bulshada faransiiska ee matilavev burjuwaasiga inav markii av taliska gacanta ku dhigeen isku dayey inay cidla' ka hindisaan aragtida dhigaysa waaritaanka, salamaguurka, iyo magudhaanka xiriirka bulsheed ee hantigoosadka. Guizot wuxuu qabay in habka hantigoosadku yahay kan ilbaxnimada bani'aadamku ku dhammaan doonto. Wuxuu viri maanta ka bacdi adduunku waa inuu u bartaa in uu la noolaado habka hantigoosadka.

Jaalle Karl Markis oo si cad oo kooban arrnitaas uga hadlay wuxuu sheegay, «Sidaas ayaa taariikhi u jirtey, ayanse dib ugu jiri doonin. Taariikhi way jirtey intii ay dhisnaayeen heyado habka dhulgoosadku ku adeegto; hay'adahaas oo aynu ka arki karno xiriir wax soo saar oo ka duwan kan bulshada hantigoosadka, bulshadaas oo ay dhaqaala-yahanku isku dayaan inay ku tilmaamaan inay tahay mid dabiici ah oo waaritaan leh».

SIDA LOOLLANKA DABAQIGU UGU ADEEGO HORUMARKA BULSHEED

Waa maxay sababaha inna gaarsiin kara in loollanka dabaqigu u adeego horumarka bulsheed? Sida qeexan ee bayaanka Shuucigu caddaynayo, taariikhdu intii ka dambeysey bulshadii bilowga adduunka ahayd ee aan waxba la kala bursan jirin, waxay ahayd taariikh bulsheed oo ku dhisan loollan dabaqeed: «Xor iyo addoon, dhalad iyo shacbi ugaas iyo adeege, maalqabeen iyo

dibjir, iyadoo kooban kadeede iyo kadeedane ayaa si joogta ah isaga soo horjeedey dagaal aan kala go'ayn, mar ha qarsoonaado, marna ha soo shaac baxo, dagaal xilli kasta u dhammaan jirey in isgeddis kacaaneed saameeyo bulshada inteeda tirada badan, ama inay dabaqadaha wada loollamayaa isla burburaan».

Ereyadaa an soo sheegay, ayey dulucda arrintu ku jirtaa. Sida caadiga ah mar haddii loollanka dabaqeed yahay mid urursan, nidaamsan, isku dubaridan waa inuu khasab ku keenaa isbeddel kacaaneed oo bulshada ku dhaca, sida ay uga wada marag kacayaan kacaannadii Maraykanka iyo Faransiiska ee sannadadii 1776 iyo 1789 iyo kuwii hantiwadaagga iyo kacaannadii wadaniga ee dimugraadiga ee garnigan aynu ku jirno Taas waxa barbar socda in marar badan gadoodka ay dadka, cadaadiska ku jiraa ku kacaan la jebiyo, iyadoo ay u sabab tahay bisaylka iyo isku xirnaanta gudaha oo kala dhantaalan. Waana arrintan ta dadka hantigoosadka iyo dhiigmiiradka imbeeriyaaliyaddu siiso riig dhabi ay ku sii jiraan. Ammurtani waa mid si sax ah ugu marag kacay saxnimada iyo cilminimada aragtida Maarkis iyo saadaashiisa.

Sida loollanka dabaqeed u saameeyo si fiyo horumarka bulshada waxaynu ka garan karnaa xaqiiqa ah: «Dabaqaduhu waa koox tira badan oo taariikhda bulshada meel ka dhigtay, meeshaas oo lagu garan karo halka ay ka taagan yihiin qalabka wax-soo-saarka, kaalinta ay ka qaataan maalbulsheedku shaqada, iyo qaybta kaga soo hagaagta barwaaqada la soo tacbo iyo helitaankeeda». Intaas oo dili waxay door weyn ka cayaaraan dhis-

maha bulshada, waxayna muujiyaan horumarka bulsheed marriinkiisa, baaxaddiisa iyo dhinaca uu u janjeerba. Dabaqaduhu waa cabbirka ugu muhiimsan si loo garto iska horimaadka bulshada dhexyaal, laguna xukumi karo hannaankooda. Wacdaro taariikheed oo qaayo weyn leh ayey dadkaas faraha badan ee dabaqaduhu ka koobmaan ka cayaaraan nolosha bulshada. Kooxahaas tiradoodu gaarayso malyuunno, waxa la soo dersa xil ivo hawlo ay taariikhdu hor dhigto oo khasbiyo ku ah inay kaalin ka qaataan. Xilkaasi ma aha mid jacayl iyo hawaawi ku vimaadda ee waa mid si mawduuci ah aaariikhdu lal timaa. duuci ah taariikhdu la timaaraan ka dhigto. Boogaadin iyo dhiirigelin waxa leh oo wax tarkeeda horena loo arkay. haatana taagan, hadba sida guusha leh ee loogu adeego danta dabagiga ah. Adduun ahaan waxa marag ma weydo ah in danta dabaqiga ee ugu ugu saamayn iyo wax-ku-ool weyni tahay tan waafagsan danta bulsho weynta bani'aadamka. Matal ahaan kaacaankii Faransiiska ee 1789kii wuxuu xilligaas u adeegayey rabitaanak iyo himilada bani'aadamka. Hase yeeshee, runtu waxay tahay in kacaan burjuwaasi ahi aan maanta riyaa. qaasi iyo saamayntaas fiican oo kale marna yeelan karayn.

Waxa isweydiin leh, sidee baa loollanka dabageed u naaxiyaa si qoto dheerna wax uga taraa taxanaha taariikheed ee xaqiiqada korriinka bani'aadamka ee iswada? Hor iyo horraan waxa loo baahan yahay in la fahmo in korriinka bulshadu ka dhasho isdiidka, iska soo horjeedka iyo loollanka ka dhexeeya dabaqadaha bulshada hantigoosadka. Buuggiisa uu kaga faallootamayo dhaqaalaha Siyaasadeed «Contribution to the critique of political Economy» — waxa Jaalle Maarkis ku sheegay: «Marka marxalad gaar ah oo korriimeed la gaaro, xoogagga wax soo saarka bulshadu waxay ka hor yimaaddaan xiriirka wax soo saarka. Taasoo, haddii si kale loo dhigo micnaheedu yahay inta loo kala jiro barwaaqada ay soo saarkeeda ku hawllanaayeen. Xiriirkaasi oo asalkiisu yahay muuqaal ka soo ifbaxay xoogagga tacabka, ayaa isu roga dabar korriinkooda xayiraya, Markaas ayaa casri kacaan bulsheed bilaab. maa. Isbeddelka salka dhagaa leed ku yimaadda ayaa siyaalo kala duwan ama kala qote duwan u beddela dhismaha guud (Taliska, Siyaasadda Hanuuninta, Dhaqanka IWM) Halkaas waxa ka caddaan kar. ta in xawliga korriinka xoogagga tacabka ka dheereeyo kana dhambalo xiriirka wax-soo. saarka. Sidaas awgeed ayaa lagama maarmaan ay u noqotay in kacaan bulsheed u dhasho si uu isu waafajiyo kor. riinka xoogagga tacabka iyo xiriirka wax-soo-saarka (marka xoogagga wax-soo-saarka dadka tacbaa barwaaqada ay soo saaraan ay ku gacan sar. reeyaan ayaa qalabka wax-soo.

saarku heer sare garaa, aqoon. tuna korortaa, tacabkuna bataa. (Maadaama habka hanti. goosadku u adeego danaha dabaqadda maalqabeenka tirada yar, waxa lagama maarmaan nogota in xiriirkaa wax-soo saarka la dhalan rogo, oo loo gediyo mid daryeelka xoogsa. tada wax tacabta u daneynaya. Habka hantigoosadku wuxuu ku caan baxay inay iskaga soc horjeedaan dabagadda burju waasiga iyo dabaqadda shaqaalaha oo u halgamaya hana. shada xukunka siyaasiga ah, iska horimaadyada iyo isdiid. ka habka hantigoosadka dhexdiisa ka sii qaraaraanaya ee ay laba daraale ugu wacan tahay maalka ama raasumaalka sida xad-dhaafka u badanaya, kuna ururaya dad yar gacantood ee isla markaas jebinaya xuduudaha ama soohdimaha dalalka kala duwan u dhexeeya, dhaqaalahoodana lab iyo qas ku ridaya, amuurtaas weeye tan khasab ka yeelay in kacaan hantiwadaag ah oo ay hoggaamineyso dabaqadda shaqaaluhu bulshadaas ka cur to. Kacaankaas bulsheed ee uu uurka ku sito nidaamka hantigoosadku waxa lama huraan ka yeela iyadoo dabaqa. dda burjuwaasiga ahi aanay marna xal sax ah u heli karin mashaakilka bulshada hantigoosadka ah ka dhex aloosan iyadoo ay si baaxad weyn aqoonta, garaadka iyo firfircoonida xoogsatadu u korayso, iyadoo aanay xoogsatadu marna u diyaar ahayn inay u adkaysato qaabkii hore ee xiriir. ka ahaa ee ka dhexeeyey iyaga iyo dabaqadda burjuwaasiga. Borolataariga (Shaqaalaha Wershadaha waaweyn) oo xisbigooda horumoodka ahi hoggaaminaayo waxay awood u leeyihiin inay isbiirsadaan da. baqadaha iyo guutooyinka ka. le bulshada ee aan midiidinsiga ku noolayn, una dhexeeya maalqabeenka burjuwaasiga ah iyo xoogsatada muruqeeda. maalka ah. Waxa kale oo aan muran ka taagnayn in xoogsatadu marka ay ku guuleysato curinta kacaan hantiwa. daag ah, xilkaasu yahay mid dhinac walba waxtar ka dhaliva. Markaas oo qura ayaa si dhab ah xididdada loo aasaa, asaaskana loo ad. keeyaa abuuritaanka bulsho ka samatabaxsan loollan iyo colaad dabaqadeed.

(Qaybta labaad kala soco tirsiga soo socda).

(Ka Yimid Bogga 16aad

Go'aan uu gaadhay shirku waxa ka mid ah; cambaareynta Ciidammada Shisheeye; sii wadidda halganka xoreynta qaybaha weli ku hadhay gumeysiga si loo dhammeys tiro nooc kasta oo gumeysi; baaq ah Afrika inay isu kaashato adkeynta dhaqdhaqaaqa Dawladaha dhexdhexaadka ah; cambaarayn culus, dhammaan Ciidammada Shisheeye iyo soo faragelinta arri-

maha u gaarka ah Afrika; baaq saameeya sii xoojinta iskaashiga waddammada Afrika iyo Carabta

Sidoo kale shirku wuxu ku baaqay inay walaalaha Carbeed kordhiyaan kaalmada dhaqaale ee ay ka geystaan koritaanka Qaaradda Afrika; in la xoojiyo taageerada halganka dadka Carbeed iyo Ummadda Reer Falastiin ee u halgamaya xuquuqdooda inay soo ce shadaan; shirku wuxu taageero u ujeediyey Ururka u

halgama Xoreynta Dalka Na Namiibiya ee (SWAPO) Jabhadda waddaniga ah ee Simbaabwe (PF); baaq ah kordhinta taageerada, kordhinta dhaqaale iyo siyaasadeed ee qalabka xoojinta halgan ka hubaysan ee Koonfurta Afrika; sii wadidda cunaqabataynta qawleysatada Salisbury iyo Pretoria.

Kulanka dambe ee U.M.A. waxa lagu qaban doonaa Monrovia sannadka 1979. Monrovia sannadka 1979. Shacbiga Soomaaliyeed ee Jamhuuriyadla Dimoqraadiga Soomaaliya deggenna wax hiil iyo hooba ah oo uu la hadhay haba yaraatee ma jirin si ay walaalihiisa Reer Jabuuti u gaadhaan xornimo.

Maanta waxa ka dhexeeya walaalnimo, derisnimo wacan, is xaq dhowr xushmo leh, istaageer iyo iskaalmaysi lama huraan ah.

Intaas iyo isu soo dhowaanta laba dal ee xorta ah ee wataalaha ah weeye waxa la diidan yahay marka dacaayadda isticmaarku nooc kastaba ha ahaatee ay fidinayso beenta ah in Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed doonayso inay Jabuuti liqdo.

Runtu waxa weeye in Jabuuti halis ku jirto. Halistaasuna waxay kaga imanaysaa gumeysiga Xabashida ee hunguriga weyn ee ku dacwiyaya inaanu Dekedda Jabuuti ka maarmayn.

Wax qarsoon maaha intay Talisyadii kala duwanaa ee Addis-Ababa isku dayeen intii Itaalkooda ah inay jillaafeeyaan Gobannimada Jabuuti.

Waxa u dambeeyey Taliskan maanta jira oo Adduun weynaha oo marag ka wada ah codkii keli ahaa ee ka soo horjeeday xornimada Jabuuti ka jeediyey Jamciyadda Qarumaha ka dhexeysaa.

Inkastoo tallaabooyinkii Addis-Ababa waxba aanay ka naasa caddaan ilaa haatan, haddana may quusan.

Iyadoo kaashanaysa kuwa danta gaarka ee istaraateejiga ah ka leh Geeska Afrika ee iyada badhi taageeraya, waxay damacsan tahay, Addis-A-baba inay qalaanqal ka riddo dadka Reer Jabuuti gudihiisa, markaana gacanta ku dhigaan.

Shacbiga Reer Jabuuti way la socdaan shirqoolkaa isaga ah.. Waana hubnaa inay diyaar u yihiin inay beeniyaan oo ay baajiyaan.

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyana, sidii caadada ahayd, waa u diyaar inay garab itaal leh u fidisomarkay halis gashoba.

Waxay 1da Luuliyo sannadkan xiisa gaar ah u sii leedahay halgankii Gobolka Soomaaliyeed ee Xabashidu gumeysato, Soomaali Galbeed, oo tan iyo intii kal hore weji cusub qaatay.

Sida Soomaali Galbeed gacanta ugu gashay boqortooyadii Xabashida waa mid taariikhdu dhigayso oo la wada ogsoon yahay, inaan halkan kaga celceliyana aan loo baahnayn, maxaa yeelay in badan baan ka hadlay taariikhdaas iyada ah

Waxa kale oo aad wada ogsoon tihiin dagaalkii dheeraa ee dadka Soomaali Galbeed ku raadinayeen xornimadooda.

Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, iyadoo qabtay, welina qabta, in si Afrikaannimo iyo derisnimo wacan ah, dagaal dhiig dad Afrikaan ah ku daatana la iska dhowrayo, xal siyaasi ah oo caddaalad ku fadhiya la raadiyo.

Haddana waajib lama huraan ah hay lu ahayd inay taageerto halganka xaqa ah

ee shacbiga Soomaali Galbeed siday Gobannimadoonka Afrika ee kaleba taageerada ugu fidinaysay.

Taasina wax qarsoon ma aha ee waa mid siyaasadda Kacaanka Soomaaliyeed caan ku ahaa, kuna qotantay Axdigiisii Koowaad.

Ha yeeshee waxa la ogyahay in waqti la gaadhay ay Gobannimadoonka Soomaali Galbeed ka caal waayeen siyaasaddaa nabad xag ku raadiska ah, dhega adaygga Tallisvadii Addis Ababa ee kala duwanaa darteed, iyadoo weliba kan u dambeeyey u bilaabay inuu si cadawtinima ah co aadininimadda ka fog u xasuugo shacbigii degganaa dhulka Xabashidu gumeysato.

Jabhadaha Soomaali Galheed iyo Soomaali Abbo way ka fursan waayeen inay hal gankooda xoojiyaan si ay naftooda u daafacaan, xornimadana gori caaraddii ku soo hooyaan.

Run ahaantiina waa kuwii soo hooyey ee dhulkoodii xoreeyey, kana saaray Ciidammadii gumeysiga Xabashida.

Sidaa ayey madaxbannaanidooda ku xaqiijin lahaayeen haddii aanay xoogag shisheeye ah oo iyagu danahooda gaara wataa soo faragelin arrinta.

Tan iyo intii dagaalku socday iyo ka horba waa wax la ogyahay oo marag ma doonta ah inta jeer iyo dhawrka jeer ee ay JDS uga digtay xoogaggii markaa isku soo tuurayey inay ka joogaan faragelinta arrin aanay ku shuqul lahayn.

Waxa si buuxda looga dhaa-

dhiciyay in dhibaatadu tahay dadkaas iyo dalkaasu gacanmid marka hore dhextaal Taliska Addis-Ababa iyo dadyowga uu gumeysanayo, labadooda dhinacna ay la gudboon tahay inay xal helaan.

Haddiise cidi ugu imanayso waa Ururka Midowga Afrika oo ay la beegnayd, welina la beegan tahay, in uu si qotodheer talo uga dhiibto.

Waxa si buuxda looga warramay, haddaanay hore u ogeyn, sida taariikh ahaan dadkaas iyo dalkaa su gacanta ugu galay boqortooyadii Xahashida, in xoog iyo khiyaano lagu muquuniyey, mas'aladu tahay gumeysi cad, ka fog tahay xarriijin soohdimeed oo laba Dawladood isku haystaan, dadyowguna xaq u leeyihiin inay helaan aaya ka talintooda.

Waxa loo sheegay inay wax yaab leh noqonayso in dowlado Hantiwadaag ahi ka hiiliyaan shacbiga la dulmaayo, u hiiliyaanna ku dulmaayey, iyadoo lagu andacoonayo waxaan taageeraynaa nidaam Kacaan ah, isla markiina la jebinayo heshiisyadii lala dhigtay dawlad Hantiwadaag ah taasoo ah Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Ilayn waa niman dano gaara watee intaas oo wax u sheeg ah waxba kuma duxin.

Waa kuwii qalab ahaan, ciidan ahaan iyo talo ahaanba la wareegay dagalkii Taliska Addis-Ababa kula jiray gobannimadoonka, iyagoo isla markii xumaanta badan diblomaasi ahaan, aflagaado, iyo weerarba u geysanaya Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Innagoo jecel xidhiidhka dawliga inaanu xumaan, haddana mar hadday arrintu halkaa gaadhay weynnu ka fursan weynay inay cilaaqaadka diblomaasiga ahaa u goyno dawladda Kuuba. Khuburadii Midowga Soofiyeetina Dalkeena ka saarno heshiiskii saaxiibtinimo ee uu isagu gooni ahaan u jabiyeyna u sheegno inaanu taagnaanayn.

Taasna waxaynu ku caddaynay go,aankii Golaha Dhexe ka soo baxay 13kii Nofembar 1977kii.

Go,aankaas ayeynu si cad ugu sheegnay faragelinta muruqa leh ee Midowga Soofiyeeto iyo saaxiibadii ka geysteen Geeska Afrika waxay uga dan lahaayeen.

Maantana waa la wada ogsoon yahay waxay ujeeddadu ahayd.

Waxay rabeen inay dawlad dabadhilif ah ka helaan Gobolka dabadeedna xoog ku qabsadaan iyagoo dhinacna danahooda istaraatiijiga ah ee ay kala dan leeyihiin Badda Cas, Gacanka iyo Badweynta Hidiya ka ilaalinaya, dhinaca Dawladaha Afrika ee Gobolka ku xeeran xasiloonidooda iyo madaxbanaanidooda qalaanqal gelinaya si ay ugu fududaato faragelintoodu.

Waxa dharaarahan dambe ka dhacayey Badda Cas dhinaceeda kale, gaar ahaan qalaanqal ka taagan labada Yamanood; waa arrin welwel weynna gelinaysa kana fogeyn waxaannu waayahanba ka digeyney.

Waxay nala tahay in dhi-

baatada ka taagan Geeska Afrika mas'uuliyad weyni ka saaran tahay Ururka Midowga Afrika.

Bilawgii dhalashadiisaba, 1963, wax cad bay ahayd in mashaakilo culus oo xal u baahani taal Geeska. Wax xal ah oo la gaadhayna ma jiraan, Guddiyadii kala duwanaa ee la gaaray talo wax ku ool ah may keenin.

Xil gudasho la'aantaasi waxay keentay in dadkii la dulmaayey adkaysan waayeen dab meeshii ka qarxo shisheeyana soo farageliyo.

Faragelinta shisheeyuhu kuma koobna Geeska Afrika. goobo kale oo Afrikaan ah ayaa, Ciidammo Afrikaan ahayne ka cagajuglaynayaan.

Halista taasi ula imanayso himiladii Afrika ee ahayd xornimo buuxda, horukac iyo midnimo, cidna caad kama saarna.

Waxaynnu ugu baaqaynaa shirka soo socda ee Ururka Midowga Afrika inuu dib u fiiriyo siyaasadduu ku socday si mushkaladaha Afrikana dhab ahaan loo xalliyo, gumeysiga dib ugu soo noqonayana, nooc kastabo ha lahaadee looga hortago.

Sidoo kale dunida saddexaad, gaar ahaan caalamka dhexdhexaadka ah, waxa ku waajib ah maanta inay daymo dheeraad ah u yeeshaan halista nabadda Adduunka uga imanaysa faragelinta xoogagga waaweyn, gaar ahaan tan Midowga Soofiyeeti oo beryahan dambe noqotay mid qaawan.

Waxa loo baahan yahay in-

ay anaqanaqaaqooda kordhiyaan, meer ega soo wada jeeswan arrimana ememus oo dumaa ka wagan, dawladaha Waaweyn besaareeyaan halista nasaddu ku jirto.

Waa inay ku adkaystaan in saldhigga nabadda Adduunku yahay xaq dhawr madaxbannaanida Dawladaha, tirtirridda gumeysiga nooc kastaba ha ahaadee, iyo dhaqaalaha dunida oo si caddaalad la isu dhaafsado.

Jaallayaal,

Intaasi aynu sida gaaban u dul marnay waa waxyaabaha muddadii gaabnayd ee Xisbigeenu dhisnaa ku soo kordhay halgankii waqtiga dheer Ummadda Soomaaliyeed ugu soo jirtay xornimo iyo midnimo, ee maalintan aan u dabbaaldegeyno xiisa gaara u yeelaya, iyo arrimo kale oo dunida saameeya.

Halka maanta halganka Jabhadda Gobannimadoonku ku sugan yahay iyo siday Jamhuuriyaddu u arkayso in lagu dhammeyn karo dhibaha iyo qalaanqalka ka taagan Geeska ee inta badan shisheeyuhu u sababta yahay dibbeynu ku caddeyn doonaa.

Waxaan haatan u gudbaynaa wixii isbeddel ahaa ee ka dhacay Dalka gudihiisa intii Xisbigu dhisnaa dhinac siyaasadeed, dhismo iyo horumar dhaqaale.

Xisbigeenna oo mabda'iisu ku neexan yahay salal Hantiwadaag ah waa kan maanta ka turjumava, cabbirava, soona dhowaynaya himilooyinka iyo ujeeddooyinka durugsan ee Ummadda Soomaaliyeed higsanayso Barnaamijka XHKS baa si buuxda u muujinaya howsha qaayaha leh oo uu Xisbigu waajib ka dhigtay inuu oofiyo.

Haddaba maanta oo ay sannadguuradiisii labaad tahay waa muran ma doonto in xisbigu isla xisaabtamo, caddeeyo wuxuu soo qabtay, intaan u qabsoomin iyo isla mar ahaantaas inuu isu soo bandhigo xilalka culayska weyn oo xiisadda Geeska Afrika ka aloosani maanta fulintooda dusha ka saartay.

Xisbigu labo sano buu jirey, taasina waa muddo aad cumri ahaan u gaaban.

Hase yeeshee labo sano oo caadi ah may ahayn, tajriibadaha iyo waayo-aragnimada u korordhayna waa mid tayo, oo ka qayb qaadanaysa halganka kharaar ee labadaa sano Ummadda Soomaaliyeed soo martay.

Bal aan isku dayo soo koobid dhinacyada kala duwan ee taariikhda Xisbiga intii uu hadda soo jiray.

Asaasidii Xisbiga ee 1dii Luuliyo 1976, waxay ahayd bilowgii shaqadii ugu cuslayd ee Xisbiga markiiba soo foodsaartay.

Waxaa khasab markiiba noqotay in dhismihii Xisbiga Go bollada, degmooyinka iyo xubnaha dhaqaalaha ee dalka laga abuuro.

Intaa ka sakow waxay ahayd inuu Xisbigu u gogolxaadho abuurid ururro bulsho, oo ka kooban ururka Guud ee Xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed, Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, Ururka Dhallinyaray Kacaanka Soo-

maaliyeed iyo ugu dambeystii Ururka Dhaqdhaqaaqa Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

Warbixinta sannadguuradii 1aad ee asaasidda XHKS baan nu si tifaftiran ugaga hadlay qaabka dhisidda Xisbiga iyo ku baahintiisa waddanka oo dhan. Waxaa maanta Xisbiga faan u ah inuu meel kasta ka dhisan yahay xataa ha noqoto heerkiisa Unuge. Warbixinnada naga soo gaaraya Gobollada badankooda intuba waxay nooga marag kacayaan sida Xisbigeennu u fidayo. Tirada wadareed ee Xubnaha Xisbiga ma aha guusha. ee waxa qiimo gaar ah leh tayada soo kordhaysa. Haddaba tayada Xisbinnimo ee horseednimadiisa ku dheehani ma aha wax ku kooban dhismihiiha ee waxa la xiriira hawlgalkiisa. Halganka isaga ahi waa mid ku qotoma hawlmaalmeed oo ah u shaqaynta dadka, taasoo sida warbixinnadu nagu soo gaarayaan veelatay dhaqdhaqaaq. Dhaqaale, dhaqan, fan ivo darveel bulshanimo.

Ururrada Bulshadu waa halbowlaha Xisbiga. Waa ururrada Xisbiga abaabulkiisa xuddun u ah: waa Ururrada ku caawiya Xisbiga inuu dadka sii dhex galo, taasoo Xisbiga nooca cusub ah waajib lagama maarmaan ku ah. Dadweynnuhu waa matoorka wada Xisbiga kalsooni la'aantooda Xisbigu horseednimadiisu way kala gaasiran tahay. Sidaas darteed abuuridda ivo xoog saaridda ururrada bulshadu waxay ahayd arrin qiimaheedu lagama maarmaan ah leh. Ururkii ugu horreeyey wuxuu ahaa Ururka Dimograadiga Haweenka Soomaaliveed oo 8dii Maarso 1977 la sameeyey. Waxaa ku xigay Ururka Guud ee Xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed oo lagu beegay 1da Maajo ee Iidda shaqaalaha Adduunweynaha ah. Ururka dhallinyarada kacaanka Soomaaliyeed oo ah kaydka ma guuraanka ah ee Xisbiga wuxuu la hanaqaaday maalin-

15ka Maajo. Ururkii ugu dambeevey ee Iskaashatooyinka oo isagu ku lug leh kobcinta ilaha dhaqaalaha isla markaasna u taagan isu ururinta dabaqadda saboolka ee xoogsatada Soomaaliyeed siiba beeraleyda, farshaxanka, qaybaha quudka, iwm. wuxuu yagleelnaayo 6dii 1978. Hadal iyo kiisii dhammaaday bishii Jandhammaantii maanta ururradii bulshadu, oo hadda kii ugu dambeevey ahaa Ubaxa Kacaanka Oktoobar way wada dhisan vihiin, halkaasina waxaa ku suurtoobay abaabuliddii iyo isku dubbaridku xoogsatada Soomaaliveed oo dhan.

Ururrada Bulshada sida la ogsoon yahay shaqo gaar ahaannimo oo la xiriirta astaamaha dadka ay ka kooban yihiin iyo xil guud oo la xiriira waajibaadka Ummadda Soomaaliyeed horumarinteeda ayey labadaba gudanayeen muddada ay dhisnaayeen.

Mitaal ahaan Ururrada guud ee Xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed waxay aad isugu adkaynayeen siyaabihii qaybta bulshada kaga soo bagaagtay ay u hormarin lahaayeen xag dhagaale. siyaasad, dhagan, iwm. dhinaca kale waxaan ka muran lahavn doorkooda horseednimada ah, oo ka sokow siyaasadaha guud ku qeexan dadaalkooda xagga xoojinta darveelka xoogsatada Soomaaliyeed. iyagoo isku davaya sidii tacahka ay u kordhin lahaayeen una ballaarin lahaaveen

Sanduuga Shagaalaha. Dadaalkoodaasu hubaal ugudambeyntii waa mid miro qiimo leh dhalin doona. Ururka Dhallinyarada Kacaanka Soomaaliyeed iyagu dhiig-cusaybnimadii iyo kaydnimadii lagu vigiinnay oo taariikh ahaan taxanna u soo ahayd mid ay ka muuqdeen bayna noqotay. Ururka Dimograadiga Haweenka Soomaaliyeed waxay intay dhisnaayeen aad isugu hawleen sidii ay Haweenka iyo dadweynaha Soomaaliyeed wacyigooda siyaasiga ah iyo kan gurigaba ay isbeddel weyn uga aloosi lahaayeen. Isla mar ahaantaas waxaa xushmo mudan sida av u soo noolaynavaan hiddihii wacnaa ee ummadda Soomaaliyeed.

Waxaannu aad ugu boorrinavnaa Xubnaha Xisbiga. hawlwadeennada Guddiyada iyo Xafiisyada Xisbiga ee kala duwan, iyo Xubnaha iyo halvadeennada Gudiyada Ururada Bulshada in ay kordhiyaan agoonteoda. Agoontaas oo noocvo badan leh: Mid caadiya, mid ah mabaadi'da Xisbiga iyo dhismahiisa iyo maamulka iyo gawaanjinta dawladda. Haddii aanay acoontooda had iyo jeer kordhin dhumuc iyo ballacba horseednimadii iyo hoggaaminta bulshadu saani ugu toosi mayso, agoon kororsi iyo wax-qabad wada socdaa lagu gaari karayaa himilada Xisbiga.

Sida ku cad barnaamijka Xishiga HKS hoggaaminta dhaqaaleed waa qodob udub dhexaad ah kuna fadhiya sidii loo heli lahaa saldhig dhaqaale oo Hantiwadaag ah, aadna u hormarsan. Ahuurid saldhig dhaqaale oo Hantiwadaag ahi waa mid u baahan helitaan Cilmi iyo farsamo lagaga baxo

dibu-dhaca dhaqaale ee uu in na dhaxalshiyey gumeysigu.

Inkastoo wax soo saarka dhaqaalaheennu maanta aanu weli kobocsanayn, haddana waa hubaal in dasheennu hodan yahay, xoolo, dhul beeraha ku fiican Kalluun ivo Macaadin hoosaha way ka buuxaan. Hidcaheennii hore ee Reer miyiga ahoa gumeysigii oo innaga reason ay waxbarasho iyo korciin run ah, iyo habka oo ka hahrahay xukunnadii Kacaanka ka horreevey. intaasoo dhammi waxay keentay in dalkii oo bodan ah, haddana dadkeennii ku sugnaado saboelnimo. Xaaiada caynkaas ayuu Kacaanku ka dhiidhiyey dadweynaha u suubaahiyey una abaabulay gorgbayaal kala dambeevana u delistav

Xisbiga Hantiwadaagga Ka caanka Soomaaliteed aad buu labadii sano ec un dhismaa isugu taxalujiyey wax ka gabadka dhaqaalahoonna isagoo ku dadaalaya dhidib u casid dhagaale Hantiwadaan ah, oo u habaysan gayb garb (Fortor Sector) mandagad (Territorial), isu miisaaman (Proportional). isuna dheellitiran (Balanced) Dhuuya Qorshe Hantiwadaag ee dhaqaale waa mid aad u goto dhoer waa mid doonaya sidii si buuyda looga faa'iideysan lahaa bhayraadka dhinac dabeecad and ivo andud beni-aadamba. Haddaha maanta avnu Timally anna. Maxaynnu hayroa? Mayaana inaka dhiman?

Xishigu isagoo tixpolinava sababo badan oo qorahihii horumarinta ee 5ta cano 1074-73 uu u wada fuli waayey idagoo isla mar ahaantaas doonaya inuu fuliyo mashaariiddii ka hadhanayd qorshahaa 5ta ca-

no wuxuu goostay inuu dejiyo orshe ku sii meel gaar ah, oo addex sano ah, kaasoo barnaamijka horumarinta Waddanku ee 1979-1981 ku meel marayo. Inteynaan haldaba gelin nuxurka qorshaha dambe bal aynu isla eegno qorshihii 5ta sano waxa ka fuley waxyaabaha ka hadhsan, iyo siyaabaha la doonayo in lagu cofivo.

Hadda oo ah 1978 waxaynu ku jirnaa sannadkii ugu dameeyey ee qorshihii 5ta sano. Oorshahaas 5ta sano waxaa had u saameeyey abaartii daa-dheer iyo korodhka sicirka hucshurada adduunka oo ciria isku shareeray. Guud ahan ascaarta seyladda adduunita ee qaaliga ahi waxay hoos u dhigtay awooddii dhaqaaluhu ka qaadan lahaa maal gelinta, arrintaasoo dib-u-dhac 70 daahid ku ridday qorshihii Sta sano.

Sannadkii 1977 waxaa noo addaatay in qorshihu 5ta sao aanu dhammaadka 1978 fuli karayn, wada gaadhi doonin bar tilmaameedyadii loo sanaystay, taasana ku kalliftay Kisbiga ivo dawladaba in gorhe dambo oo ay ku hubiso fu-Entii mashaariicdii hore iyo u jogoldhig ku kale inay dejiyaan. Qorshahaan dambe 1979 1981 wuxuu ku xisaabtamay tharash dheeraad ah oo uu "ambaarsanaayo. Qadderkaa harashka ah oo soo xambaarmmaya waxaa lagu talo galay muu ahaado 3.6 Bilyan oo Shiin, labo Bilyan oo ka mid ah harashkaasna waxaa loo iscmaalavaa mashruucyada usub oo mudnaansho sare la inayo. Sannadkan 1978 bar lmaameedka qorshuhu waa nid ka yar kii 1977 sababtoo ch annagoo yaqiinsannay in

awoodda qaadashada dhaqaa-Iuhu (Absorpativ Capacity of the Economy) ay duruuf dhab ah daraadood kooban tahay.

Waayo-aragnimada qorsheheennu inna tusayso waxay tahay in bartilmaameedyada aynu samayno kharbudaaddi ku dhacda waayo heerka assevladda Adduunka mid gacanteenna ku jira ma aha. Matalan afartii sano ee ugu dambaysay iyadoo (i) la tixgelinayo ascaarta kacday iyo (ii) isla mar ahaantaas kharashka kordhay mashruucyada cusub darteed, waxaa khasab noqotay in 3,370 Malyuun oo Shillin ay ku korodho miisaaniyaddii hore taasoo kharashkii gaarsiisav 7.120Malyuun, halkuu markii hore ka ahaa 3,750 Malyuun, haddii la xisaabiyona kordho 89%. Korodhka lacagtii la qorsheeyey waxay keentay isbeddel xagga qaybsashada maalgelineed ee gavbaha dhaqaale ee kala duwan arrintaasoo si toos ah u saameysay beeraha iyo warshadaha, si dadbanna wax uga beddeshay saansaanta dhaqaale (Infrastructure). Guud ahaan maalgelinta dambe wuxuu dheelliga u badiyey xoojinta qaybta wax soo saaridda maadiga ah. Isbeddelka qaybsashada maalgelineed ee qaybaha dhaqaalaha ee kala duwan sannadkii 1974-1978 shaxda hoose ayaa laga arki karaa.

1974 (%) 1978 (%) **QAYBSASHADA**

QORSHIHII SHANTA SANO

- 1. Beeraha 36 6
- 25.7 1. Warshadahha 16.4 32.3
- 3. Saansaanta dha-

qaale (Infrustructure) 31.6 31.0

4. Wax soo saarid

maaddi ah. 84.6 89.0

Qaybta beeraha waxaa halkan ku jira Xoolihii; iyo Kalluumeysigii, sidaa darteedna waa qayb aad u ballaadhan. Qaybta saansaanta dhaqaale wuxuu isna ka kooban yahay Korontada, Biyaha iyo Gaadiidka oo idil, qaybta wax soo saaridda maaddiga ahina waa isku darka saddexda qayboodha

Haddaannu qiimeyn guud ku samaynno qorshihii 5ta sano oo hadda weli aan dhammaan waxaynu arkaynaa in fulintiisu gebi ahaan gaadhay 48-50%, inkastoo fulinta qaybaha dhaqaale ay kala duwan yihiin. Haddii fulinta sannado loo kala qaado sida soo socota bay kala nogon:

1974 (52.7%)

1975 -(28.8%),Sababtoo abaartii;

1976 - (47.9%);

1977 (71.2%),

1978 - (65.8%).

Waxaa muuqata in sannadihii dambe ee Xisbigu jiray fulintu sare u kacday. Dhibaatooyinka qorshaheenna haysta waxaa ugu weyn inaan hay' aduhu qaadan intii miisaaniyaddu ugu talo gashay, arrintaasuna waxay muujinaysaa awood ama tabar qaadasho la' aan maalgelin. Awood yarida qaadashada kharashka maal gelineed waxaa loo malaynayaa inay ugu wacan tahay arrimaha soo socda:

- (i) Kharashkii la meeleevey oon si habsami ah ugu durdurmayn meeshii iyo waqtigii loogu talo galay:
- (ii) Ku daahid dhammaystiridda xilalka ka horeeyey maalinta (Sahanka, deraasadda, nagshadaynta, iwm).

(iii) Dib u dhicid iyo joogsi shaqo, taaso ku xisan alaabtii samayska ama dhismaha oo hore loo waayo.

Iyadoo aynu arki karno delbaatooyinka badan oo hadba inna la soo dersaya ayey lagama maarmaan tahay in gorshaha cusub ee 1979-1981 ka taxadaro daldaloolooyinka innaga soo food saari kara fulio buuxda qorshaha aynu dhiganno. Qorshe walba dhibaatadiisuu leeyahay, qorshe dhaqaalena waa mid baal walboo nolosha ay tahay inuu khuseevo, waa mid dhinacyo kala duwan iyo isirro badan ay tahay inuu isu keeno, heshiisiiyana. wuxuu wagti walba ku dadaalayaa inuu ka dhigo qorshihiisa mid cilmiyeysan, kuna dabagan duruuftiisa, waayo wuxuu xisbigu ogsoon yahay oo maanka ku hayaa in dhaqaaluhu vaha salkii ugu muhiimsanaa, jiriddii iyo xididdadii nolosha, oo la'aantii hanasho barwaago, bashbash iyo darvecl bulshadeed av vihiin dhalanteed iyo caad aan waxba ka jirin.

Jaallayaal,

Tusaaloovinkaas aan dhinacyada kala duwan ee bulshadeenna ka soo qaadannay waxay marag u yihiin xawlo dhaqsaha leh ee isbeddel-taveedka bulshada iyo horumarka guudba ku seedaan Falsafadda Kacaanka ee Hantiwadaagga ah, xisbiguna dhidibadiisa u sii aasay, hanuunintii joogtada ahayd, nidaamka habka cusub ee Xisbigu ku naf-huridda dhaqmayo, iyo dadkeenna ayaa fadhigaana iska leh. Intaasoo isku dhammi waxay ina siisay xoog aan la leedin karin iyo awood weyn

oo aan kaga hertagayno dhib kasta oo innala soo beeganta ha ahaato tu xagga dabeecadda ka timaadda, dhinaca dhaqaalaha aha in maddaha.

Waa quwadda inna karsiisay inaan abaarihii ka lib helno, cudurka iyo aqoon darrada dagaal qadbaadh la galno dhismaha dalkeenna heer fiican gaarsiinno, jillaa ooyinka dabadhilifyada isticmaarkana kufinno, gardarrada cadawgana gaashaanka u daruurno.

Markii uu gu' jirsaday Kacaanku ayuu Golihii Bare ee Kacaanku ku dhawaaqay in mabda'a Hantiwadaagga ahi yahay dhabbaha keliya ee bulshada gaarsiin kara horumar shaqo ah, kuna habey an sinnaan iyo caddaalad, Haddii aynu rabnay qaran isku duuban, ka lib hela qayb qaybta ivo kala firirsanaanta, u darban inuu ka baxo nelegha dulliga iyo dib u dhaca ah, way inoo caddayd inaan hi.niladaas lagu gaari karayn niddaamkii musuqa ahaa ee Kacaanku dhaxlav. kaasoo ku xirnaa kuna dayanaaray nidaamyo beri hore ka hirgalay duni aan teenna abayn Nidaamka caynknas ahi waynu wada aragnay aayuhuu inna dhaxa'siiyey siduu ahaa.

Lama huraan bay ahayd, Jaallayaal, marka in Kacaan-Sku dhalilia kali reexo Ha yeeshee ummadina cilla kuma ncola, waaya-aramimada taariikhduna h ni aadankoo dhan waa u dhex. Ilaa baddana taariikhda dunida ee isbeddelka dhagan-dhagaale waxay si cad inoo tusayraa in dunidu soc martay nidaaniyo kala duwan sida dhulgochi, hantiwalibana kan ka dambeeya ka goosi ivo hantiwadaag, mid horumarsan yahay. Waxaa kale oo iyana cad in waqtigan maanta ah dhabbaha horumarka dhaqaalo ee hantigoosigu ka owdan yahay dalalka varyar ee soo koraya, kana ma bakay uurka gumeyiga, maxaa yeelay aburuudihii u cuura geliyey dalalka hantimegsiga saddex begol oo sannadood ka hor in ay heer sare ka gaaraan dhaqaalahooda, maanta ma heryaalliin dalalka sco koraya haddii ay si yiraabdaan hilinkaa maran waxa u dambeeya waa hungow, sida inaga iyo kuwa kaleba u arkeen, kuwa ka waayohoodu tusi doeno

Hilinka Kacaanka markaa u bannaanaa, Jaallayaal, haddii dalkiisa iyo dadkiisa u daacad vahay, rabana in uu kaga dhabeeyo himilooyinkaan ker ku soo sheegnay, wuxuu abaa Hantiwadaag-Hantiwadaag. guse ma aha waxyi rabbaani ah. waa hab waayaha aadanuhu soe saaray, si uu neloshiisa hore ugu mariyo. Taas macnaheedu waxa weeyo in dal iyo dad waliba waafaiiyo dhaqankiisa, iyo heerka dhagaale ee uu mariyo. Sidaas avev u dhacdaa in badan in, iyadoc qawaaniintiisa guud isku mid tahay, haddana habka hirgelinta iyo kala mudnaansiinta arrimuhu u kala be raa dalalka kala duwan.

Haddaba innagu haddii aan Soomaali nahay si'a aan Hantiwadaagga u hirgelineynaa waxay tahay mid waafaqssan amuuraheenna gaarka ah sida hiddaheenna, Diinteenna, shaqaale-Warshe yari, dadkeenna oo u badan reer guuraa, IWM.

Sidaas ayuu bilowgiiba kacaanku u arkayey arrinta, sidaas ayuu u hirgeliyey isasheeye. Muddadii toddobada goon dan ka yeelan eedeyn shi sano ee Golaha Sare ee Kacaanku hoggaanka hayey iyo labadii sano ee ka dambeeyey ga u hirgelinaynaa waxay nahay sida aan Hantiwadaagee Xisbigu jiray waxay inna indhasaaban. Wax badan baan kuwaa gudaheenna kala dagaalanay. wax kastoo laga hortagana ma quustaan. Waxaa ka mid ah kuwii maalintii dhoweyd ee 9kii Abriil isku dayey in ay ku adeegtaan Ciidammada Qalabka Sida si ay u afgambiyaan Hoggaanka Xisbigeenna Kacaanka ah ummadda Soomaaliyeed markaa uga lumiyaan hayaankii horukaceeda. Waa la ogyahay oo waxaa markiiba ka hortegey, hadimadoodiina baajiyey Ciidammaddeenna, iyo dadweynaheen na Kacaanka ee heeganka ah. Inkastoo kooxdaas yari meel gaarin, sharciga waxay ka muteystaanna sugayaan, haddana waxa xusuus mudan in iyagoo kale weligood la waayeyn.

Waxa innala gudboen markaa waxa weeye, illayn dhabahaan ku soconno garannay, goosanay, kuna adkaysannaye inaan feejiga dheeraada u yeelanno wixii raba inay innaga habaabiyaan ama inna kufiyaan.

Sida keliya ee aan taas ku gaari karnaa waa midnimo iyo isku duubnaan, ummad midnimadeedii kala dhantaalantay waxba meel uma maraan, cadow walbana dibed iyo gudaba waa u halis. Bal eegoo, goor walba oo ummadda Soomaaliyeed guuleysataymin waqtigii Axmed Gurey, ilaa xorriyad hilkii, ilaa Kacaanka waxay ahayd mar ay

isku duuban tahay. Goor walboo hakad helaana waa mar ay kala firirsanaan iyo qayb qayb gudaheed soo gashay.

Waxaan ka codsanayaa qof walkoo Soomaaliyeed in uu aad u fiiriyo waqtiga adag ee dalkiisu marayo, in uu yaqiinsado, in waddankiisa, oo aan ka lahayne, dhisma ahaan iyo daafac ahaanba isa ga sugayo. Markuu qof waliba sidaas dhinaciisa uga qabto waan hubaa inaan waxba innaga xumaanayn. waxa lama huraan ah maanta inaynu siyaadda iyo barnaamijka toosan ee Xisbigu dalka ku hormarinayo kuna difaacayo ku soc wada hirannaa.

Cadowga ummadda Soomaaliyeed inuu gudaha qas ka rido isku deygeeda kuma kaaftoomayo. Siyaaba walba wuu isticmaalayaa. waa ka bervahan dambe isku darayey haddidaad iyo weerar diyaaradahiisu ku soo qaadaan magaalooyin iyo tuulooyin ka mid ah JDS. halkaana dad ku laayeen, qaarna ku dhaawaceen, xoola iyo hanti badanna ku burburiyeen. Wuxuu dembigaas gardarrada ah ugu kacayaa Taliska Addis Ababa, isagoo ku andacoonaya in Gobanimadoonka dagaallkoodii sii wada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed u sabab tahay. Markuu u adkeysan waayey wacdaraha av geesiyaasha gobannima doonka u halgamaya u geysanayaan ciidamadiisa goobaha dagaalka, ayuu kula soo galganayaa Jamhuuriyadda. Waxaanu xusuusinayaa Taliskaas isaga ah in dadka Jamhuuriyaddu, Ciidan iyo shacbiab diyaar u yihiin daafaca dalkooda, haddaanu radaas bareerka ah joojinna

kala kulmi doono jab iyo halaag.

Dadyowgii Soomaali Galceed, Abbo iyo Eriteriya, haddil ay goosteen inay u diriraan, nattoodana u huraan, xornimada ay xaga u leeyihiin cid ka celin kartaa ma jirto, ciidan ka adkaadana la heli maayo. Sidaannu hore u soo sheegnav JDS waa tii in badan ugu digtay shisheeyaha in ay soo fara geliyaan. Maantana markii JDS, iyadoo baaqii adduunweynaha tixgelinaysa, av la soc negotav cutubvadii ay Gobannimadoonka ku taageertay, haddana waxa run caddaana ah in ciidammadii shisheeyuhu weli joogaan Gobolka. Faragelinta shisheeyuhu way sii murginaysaa arrinta, dabka ka holcaya Geeska Afrikana way sii raajinaysaa. Waxay nala tahay annaga, haddii nabad la rabo, xiisadda adduunka ee sii fidaysana labaajiyo, in Ciidammada shisheeve dhammaan ka baxaan Geeska Afrika. Markaa ka dib waa in Ururka M. Afrika si xilkasnima ah u guda galaa arrinta iyadoo laga duulaayo xaga av ummaduhu u leeyi yihiin madaxbannaani. JDS, had iyo jeer waa u diyaar in ay kaalmo buuxdda ka geysato sidii loo heli lahaa nabad xaq ku dhisan oo waarto.

- _ HA GUULAYSTAAN GO-
- _ BANNIMADOONNADU;
- _ XHKS HA WAARO
- AFRIKA GUMAYSIGA HA KA LIB HESHO;
- _ UMMADDA EOOMAALI-YEEDNA HIMILADEEDA HA GAARTO;

TUSAALLOOYINKII MADAXWEYNAHA

Faragelinta shisheeyuhu kuma koobna Geeska Afrika. Goobo kale oo Afrika ah ayaa Ciidammo aan Afrikaan ahayne ka cagajugleeynayaan.

Halista ay taasi ula imaneyso himiladii Afrika ee ahayd Xornimo buuxda, horukac iyo midnimo, cidna caad kama saarna.

Ururrada Bulshadu waa halbowlaha Xisbiga. Waa Ururrada Xisbiga abaabulkiisa xuddun u ah.

Dadweynuhu waa matoorka wada Xisbiga kalsooni la'aantooda Xisbigu horseednimadiisu way kala gaasiran tahay. WAXAA LAGU DAABACAY

Aller - Constitution for the State -

WAKAALADDA


the Address Santable Edward while weeked Shirt St. Chin.

MADBACADDA QARANKA


ISTA THE CHARLES WEN THE DATE OF PARTY AND A

the interpretation of the contract of the contract of

the distance with repulsional to the



Dhadhansiga Cilmiga Af-Soomaaliga fure u noqday. Bilicdii Miyiga oo Farbaraneysa.



Quruxda Silsiladda Buuraha Golis